

الرسمية



الجريدة

Official

Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 10aad

Muqdisho, 31 OCTOBER 2023

Lr. 2

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BILAHA SOO BAXAY

Qiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

BILAHA

APRIL - OCTOBER

2023



The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 06/07/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.133

XEERKA: XEER NIDAAMIYAH A HAGAHA IIBKA DEG DEGA AH.

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;



Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} farqadaha (a), (b) iyo (i) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100^{aad} farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqada summadeedu tahay MOF/OM/319/2023 ee ku taariikheysan Juun 18, 2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.37.07.23 ee 06/07/2023, kuna saabsan ansixinta Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah.

Wuxuu Meel-mariyey:

Oodobka 1^{aad}

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay SHGW.00.37.07.23 ee 06/07/2023, kuna saabsan ansixinta Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Oodobka 2^{aad}

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana
Xeer Nidaamiyaha Hagaha Iibka Deg Dega ah.

Oodobka 3^{aad}

Xeer Nidaamiyaha Hagaha IibkaDeg Dega ah waxa uu dhaqan-galayaa marka uu
Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,
waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.



Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN - 064-23

TAARIKH: 09/07/2023

SAXIIX:

HANTIDHAWRAHA GUUD

AVV. Ahmed Isse Gutale



**JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda MAALIYADDA**

**WAREEGTO LAMBAR -----, Taariikh-----/-----/2023
HABRAACA HAGAHA IIBKA DEGDEGA AH**

Tusmo

Horudhac	4
Qeypta I: Go'aaminta marka libka Degdega ah uu banaanyahay	5
1. Go'aaminta Xaaladda libka Degdeg ah	5
2. Shuruudaha duruuriga ah ee Oggolaashaha lib Degdeg ah	6
3. Go'aan ka gaaridda Jiritaanka Xaaladaha Deg-dega ah	6
4. Go'aan ka gaarista isticmaalka libka Degdega ah	7
5. Codsiga oggolaanshaha libka degdega ah	8
Qeypta II: Arrimaha muhiinka ah ee Nidaamka wax soo Iibsiga deg-dega ah	9
1. Qorsheynta iyo u diyaargarowga libka deg-dega ah	9
A. Wajiyada gurmadka dedega ah	9
Shaxda 1-aad ee Wajiyada Gurmadka Degdegtah ah iyo Nidaamka libkiisa	10
B. Qiimeyn ta Xaaladda	11
C. Shaqaalaha iyo Awoodaha	12
D. Baaxadda libka	12
E. Uruurinta Xogta La-iskala xiriirayo	13
F. Qorshaha libka	13
G. Maareynta Khataraha	13
Shaxda 2-aad: Qiimeyn ta khataraha ka dhanka ah niidaamka iibsiga degdega ah iyo sida loo yareeyn karo	14
H. Ka-talagelinta baaxdda bulshada ay khuseeyso	15
Qeypta III: Nidaamka la hirgeliyay ee libka	17
Qeypta IV: Iisticmaalka awoodda Dowladda	18
Qeypta V: Bulshada maxalliga ah oo wax laga soo iibsanayo	18
2. Habraaca nidaamka libka	20
A. Bilaabida habka wax iibsiga	20
B. Codsiga ka qaybgalka	20
C. Iisticmaalka wax iibsiga elektaroonigga ah	21
D. Soo iibsiga hal-abuurka	21
E. Qiimaynta tartanka qandaraasyada	21
F. Macquul ahaanshaha Qiimaha	22
G. Codsiga habraacyada dib u eegista cabashooyinka	22
3. Codsiga habraacyada dib u eegista cabashooyinka	23
A. Qaabka qandaraaska	23
B. Lacag Bixinta	24
C. Kormeerka fulinta heshiiska	25
Qeypta: IV: Ka-bixidda marxaladda soo iibinta degdegga ah	25
Daahfurnaan iyo Isla-xisaabtan	25
1. Daahfurnaan	25
2. Isla xisaabtanka	27

QeytaV: U diyaargarowga soo iibsiga kahor xaaladaha degdega ah	28
QeytaVI. Qiimaynta soo iibsiga degdega ah	30
3. Qorshaynta	30
4. Habraacyada soo iibsiga	30
5. Maareynta qandaraaska	31
6. Daah-furnaanta iyo Isla-xisaabtanka	31
Lifaaqa 1 Wareegtada Soo iibsiga Degdega ah	32
QEYBTA A: Marka la isticmaali karo soo-iibsiga degdega ah	32
QEYBTA B: Oggolaanshaha soo-iibsiga degdega ah	33
QEYBTA C: Habraacyada soo-iibsiga degdega ah	34
QEYBTA D: Hagida guud ee soo-iibsiga xaaladaha degdega ah	35
Lifaaqa A. Qeexida habraacyada iyo shuruudaha ansixinta ka hor soo iibsiga degdega ah	37
Lifaaqa B. Foomka Codsiga Oggolaanshaha Iibka Degdega ah	40
Lifaaqa C. Qaabka Ogolaanshaha Soo-iibsiga Degdega ah	42
Qeyta 2 Liisaska hubinta marxaladaha wax ka qabashada xaaladda degdega ah	44
Qeyta 3 Liiska saadka & adeegyada muhiimka ah ee ka-jawaabista xaaladda degdega ah	49
Qeyta 4 Qaabka Warbixinta ee Habka Soo iibsiga Degdegtah ah	51

Habraaca Hagaha libka Degdega ah

Horudhac

1. Wasaaradda Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay soo saartay taariikhdu markay aheyd (-----) Wareegto lagu nidaaminaayo libka Degdega ah (si loo tixraaco, Wareegtada waxaa lagu dhejiyay lifaaqa 1-aad ee Hagahaan). Isticmalayaasha Hagahaan waa inay aqriyaan marka hore fahmaan Wareegtada. Hagahaan waxa uu taageero oo keliya u yahay dhaqangelinta Wareegtada, maadama Wareegtadu ay tahay xeerka go'aaminaya libka Degdega ah. Sidaa darteed akhrinta Hagahaan waa inaan loo arkin inay meesha ka saareyo akhrinta iyo fahanka Wareegtada.
2. Xaaladaha degdega ah qaarkood, isticmaalka nidaamka libka ee caadiga ah uma diyaarsana in si waqtieeysan oo wax ku ool ah ay kaga jawaabaan xaaladda degdega ah. Sharciga libka Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya (oo halkaan loogu yeeri doono Sharciga) iyo Xeer-nidaamiyeeyaashiisa ayaa ka kooban dhawr Qodob ee la xiriira nidaamka libka Degdega ah (isticmaalka tartanka xaddidan, libka tooska ah iyo ka maarmidda waqtiga xallinta cabashada).
3. Wareegtadu waxay qeexeyso tillaaboo yinka loo baahan yahay in la qaado marka xaalad degdeg ah ay qasbeeeyso in laga leexo nidaamka caadiga ah ee wax soo libsiga ee waafaqsan Sharciga. Waxaa ku lifaaqan Wareegtada dhawr habraac iyo nidaamyo oggolaansho ee loogu talagalay libka Degdega ah (Lifaaqa A ee Wareegtada). Waxaa sidoo kale ku lifaaqan foomam iyo qaab-qoraaleed ay tahay inay isticmaalaan Saraakiisha Idman marka ay codsanayaan, soo saarayaan ama oggolanayaan libka Degdega ah (Lifaaqa B iyo C ee Wareegtada ayaa lagu muujiyay).

Hagahaan waxa uu bixinayaa warbixin dheeri ah, foomam iyo cabirro lagu sameeynaayo libka Degdega ah. Gaar ahaan, Hagahaan waxa uu ka hadlayaa:

- Shuruudaha lagu aqoonsanaayo xaaladaha ku haboon libka Degdega ah (Qaybta 1-aad).
- Habraaca iibka ee ka jawaabista xaaladaha degdega ah sadaxdiisa heer ee kala ah: qorsheynta, iibinta, maamulidda qandaraaska iyo waliba wajiyada kale ee xaaladaha degdega ah (oo ay kujirto marka laga yaabo in laga leexo nidaamka iibka ee caadiga ah) (Qaybta 2-aad).
- Nidaamka joojinta libka Degdega ah, maadama libka Degdega ah aan si joogta ah loogu dhaqmi karin markii baahidii jirtay ay dhamaatay (Qaybta 3-aad).
- Hufnaan iyo isla-xisaabtanka (Qabyta 4-aad).
- Sida loo yagleelaayo nidaam diyaarsan oo lagu maamulo libsi wax ku ool ah oo ka jawaabi kara xaaladaha degdega ah (Qaybta 5-aad).

muunad tixeeysa hadafyada waxqabad (KPIs) ee lagu go'aaminaayo libka Degdega ah (Qaybta 5-aad).

- Lifaqyo ay ku jiraan: wareegtada Wasaaradda Maaliyadda ee libka Degdega ah iyo lifaaqyadeeda (Lifaq 1-aad); liis-hubineed oo qeexaya tallaboooyinka ay tahay in loo maro libka Degdega ah (Lifaq 2-aad); liiska qiyaasta ah ee alaabta iyo adeegyada ku haboon xaaladaha degdega ah (Lifaqa 3-aad); qaab-qoraalka warbixin soo gudbinta ee arrimaha libka Degdega ah.

4. Waa in la ogaadaa inuusan jirin hal qaab oo go'an oo lagu wajihii karo libka Degdega ah. Tusaale ahaan, marka la qeexaayo nuxurka habraaca libka Degdega ah, arrimo badan waxa ay ku tiirsanaan doonan xaaladda degdega ah heerka ay mareeyso (xaaladda degdeg ah marka ay dhacdo miyaa, marka laga soo kabanaayo miyaa mise dib-udhiska dhibkii kadhashay xaaladdaas – Wareegtada faqradda 11-aad).

5. Wareegtada iyo hagahaan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan Hay'adaha Dawladda Federaalka ee wax soo iibsanaya. Hay'adah DFS ee wax soo iibsanaaya waa inay u qaybiyaan Wareegtada iyo Hagahaan shaqaalahooda, walibana ay hubiyaan in shaqaaluhu fahmo labada dukuminti.

Qeybta I: Go'aaminta marka libka Degdega ah uu bananayahay

1. Go'aaminta Xaaladda libka Degdeg ah

6. libka Degdeg ah sidiisuba waa qaali, sidaa darteedna waa in marar dhif ah la isticmaala, oo loogu baahdo in laga jawaabo xaalad degdeg ah. Sidaa awgeed, isticmaalka libka Degdega ah waa inuu ku ekaadaa xaaladaha dhab ahaantii loo baahanyahay. Nuucyada xaaladaha oggolaan kara isticmaalka Habka libka Degdega ah (Wareegtada faqradda 2-aad) waxaa kamid ah:

(b) Musiibooyinka dabiiciga ah ah iyo kuwa bini'aadamku sababo (tusaale, musiibooyinka bay'adda, burburka kaabayaasha ama qalabka muhiimka ah, musiibooyin la xiriira caafimaadka sida cudurada safmarka iyo caabuqa faafa, xaaladda degdega ah ee ka dhasha siyaasadda sida dagaalka iyo kacdoonnada);

(t) Xaaladaha degdeg ah ee ka dhasha dagaallada, kacdoonnada iyo falalka argagixiso; iyo

(j) Xaaladaha aan horay loo qiyaasi karin ee keenay in hay'ad DFS ay ku qaban weyso hawl ama adeeg daruuri ah waqtiga ku haboon.

2. Shuruudaha duruuriga ah ee Oggolaashaha lib Degdeg ah

7. Sida ku cad kor, waaa inay jiraan shuruudo ay daruuri tahay in la arko ka hor inta aan la billaabbin nidaamka iibka degdega ah - xataa haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo guud. Shuruudahaas waxaa kamid ah:

- (b) Jiritaanka xaalad degdeg ah oo dhab ah;
- (t) Baahi loo qabo kaalmo degdeg ah, taas oo aan la bixin karin haddii la isticmaalo nidaamka libka caadiga ah ee leh waqtiyada degsan.
- (j) Xaaladda degdega ah oo aan horay loo arkin ama aheyd mid degdeg ah¹, iyo
- (x) Xaaladaha aan ka dhalan dayac-darrada hay'adda DFS ee wax soo iibsaneysa ama lagu eedeyn karo hay'adda DFS (tusaale ahaan qorsho xumo, ama dhicitaanka misaaniyadda dhamaadka sanad maaliyadeed ma oggolaan karaa isticmaalka libka Degdega ah).

8. Iyadoo la isticmaalaayo caqli ku dhisan xirfad, go'aan ka gaarista inay jirto xaalad degdeg ah oo u baahan iib degdeg ah waa in lagu saleeyo xaqiyooyinka xaalad walba u gaar ah, maadama xaaladuhu waqtiba waqtiga ka dambeeya isbed-bedelaan. Haddii ay macquul tahay in loo sii baahdo in iib dheeri ah la sameeyo, kadib marka laga baxo xaaladda degdega ah, waa in go'aanka ah in iibka la xiriira xaaladda degdeg ah lagu sii wado sida degdegta ah iyo in kale lagu saleeyaa shuruudaha kore. Tusaale ahaan, markasta oo waqtigu isbedelo, baahida degdega ah ee loo qabo libka Degdegta ah waxa laga yabaa inuu yaraado, oo xaalad markii hore aan la qiyaasi karin ayaa laga yaaba inay noqoto mid la qiyaasi kar.

3. Go'aan ka gaaridda Jiritaanka Xaaladaha Deg-dega ah

9. Marka laga soo tago in la qeexo nuucyada xaaladaha jiri kara si loo oggolaado isticmaalka Iibka Degdeg ah, Wareegtada (Faqradda 3-aad) waxay qeexseysaa oggolaanshaha maamul ee loo baahanyahay in la helo si loo xaqiijiyo jiritaanka xaalada degdega ah:

¹ Tani meesha kama saareeyo u isticmaalka habka libka Degdeg ah xaaladaha degdeg ah ee soo jiitamay (sida abaarah, nafaqa daradda iyo macluusha).

(b) Marka ay timaado xaaladaha degdega ah ee dabiiciga ah ama bini'adamku sababo, waa in Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha shaaciyya jiritaanka xaaladda degdega ah².

(t) Marka ay timaado xaalad amni ee degdeg ah ee ka dhalata dagaal, kacdoon iyo falalka argagixiso, waa in Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha shaaciyya jiritaanka xaaladda degdega ah.

(j) Haddii xaaladdu tahay mid aan horay loo qiyaasi Karin oo kadhigeysa midaan macquul aheyn in hay'adaha DFS ee ku shaqada leh inay qabato hawlah muhiimka ah ama ay bixiso adeegyada daruuriga ah, shaacinta xaaladda degdega ah ee dukumiteeyaysan ee uu bixiyo Sarkaal Idman ee hay'adda ayaa ku filan.

4. Go'aan ka gaarista isticmaalka libka Degdega ah

10. Saraakiisha Idman ee hay'adda wax iibsaneysa oo keliya ama sarkaal kale ee Sarkaal Idman u idmaday hawlah libka Degdega ah, ayaa, iyadoo loo hoggaansamaayo shuruudaha lagu qoray Wareegtada, go'aanmin kara, haddi danta guud ay ku jirto, inay jirto xaalad oggolaanaysa isticmaalka nidaamka iibka degdega ah ee ka leexsan nidaamka wax soo iibsiga ee caadiga ah. Balse haddii qiyaasta qiimaha wax lagu soo iibsanaayo ay tahay \$100,000 ama ay ka badantahay, waxa loo baahanyahay oggolaanshaha Guddiga Qandaraasyada3 kahor inta aan la bilaamin isticmaalka nidaamka iibsiga degdega ah.

11. Guddiga Qandaraasyada ayaa usoo saari kara oggolaansho saameeyn tixanleh (blanket approval) qaar kamid ah wax iibsiga isticmaalaya xulashada halka-il oo keliya ah ama iyadoo loo hoggaansamaayo Wareegtada, wax iibsiga tooska ah (direct procurement) ee leh tartanka (Wareegtada, faqrada 7-aad).

12. Guddiga Qandaraasyada ayaa oggalaan kara in hal meel laga sameeyo iibsiga (central procurement) mararka ay ku haboontahay - sida hadii ay jirto tiro cayiman, si loo yareeyo waqtiga iyo kharashaad maamul ee kale ee ku

² Xarunta Hawlah Gurmadka Qaranka (NEOC) ee Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha ayaa shaacisa xaaladaha degdega ah ee heer gobol ama mid qaran, iyadoona isku-duba rida kaalmooyinka lagu xalinaayoo xaalada degdega ah. Xarunta Hawlah Gurmadka Qaranka waxay ka gacan siisa Wasaaradaha ay khuseeyso iyo hay'adda kale ee DFS inay hubiyaan in kaalmada loo baahanyahay la qoondeeyo iyo sidii loo isticmali laha kaalmooyinkaas.

³ Guddiga Qandaraasyada, ee lagu aas-aasay Qodobka 30 (2) ee Sharciga iyo Qodobka 19 ee Xeer-nidaamiyaha, waxa uu ka koobanyahay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda, Agaasimaha Waaxda Miisaaniyadda, Agaasimha waaxda libka ee Wasaaradda Maaliyadda, Xubin Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha, Xubin Wasaarada Howlaha Guud iyo Guryeynta, Xubin Wasaaradda Gaadiidka iyo Xubin Wasaaradda Arr. Gudaha.

Fiira gaar ah. Guddiga ha la waafajiyo Sharciga libka Qaranka

baxaaya hawlaha iibka (Wareegtada faqradda 7-aad); alaabahaan waxaa lagu soo iibsan kara qandaraas aan cayimneen (framework agreement), iyadoo lagu daabacaayo website, si ay ugu fududaato isticmaalayaasha alaabta inay si fudud u dalbadaan.

13. Codsiga oggolaansho raadiska ah ee loo dirsanaayo Guddiga Qanaradaasyada waxaa u soo diraya Guddiga Sarkaalka Idman ama qof uu u idmaday hawshaas.

14. Oggolaanshaha iibkasta ee degdeg ah waa in la ogeysiya Maamulka⁴ iyo Guddoomiyaha Guddiga Maamulka Khasnadda Mideysan sida ugu dhaqsaha badan, kadib marka lasoo saaro.

5. Codsiga oggolaanshaha iibka degdega ah

15. Hay'adda wax iibsaneysa waa inay u soo dirtaa Foomka Codsiga ee libka Degdega ah ee ku jira Lifaaqa B ee Wareegtada. Codsigu waa inuu ka koobnaadaa faahfaahin cad oo tilmaameysa haddii ay jiro in laga leexanaayo nidaam wax soo iibsiga ee caadiga ah oo ay hay'adda wax soo iibsaneysa ay rabto.

16. Eray bixinta "ka leexasho nidaamka caadiga ah ee wax soo iibsiga" waxay ka koobantahay tallaabooyin dhawr ah oo ka duwan nidaamka caadiga ah ee wax iibsiga Sharcigan dhigayo, sida kuwa khuseeysa heerka tartanka, waqtiga ay tahay inuu qaato hawsha wax soo iibsiga iyo qandaraas siinta, isticmaalka nidaamyo dukuminti ee ka fudud kuwa sharcigu dhigaayo iyo ka tanaasulidda muddada joogsiga (standstill period) ee ka horeeysa qandaraas galista. Majirto hal nidaam oo wax walba ku filan marka laga hadlaayo iibsiga degdega ah, sidaa darteed hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay ahaata mid u furan tallaabo kasta oo macquul ah ee lagu oggolaaday Wareegtada iyo Lifaaqeeda A, marka ay go'aansaneeyso nidaamka degdega ah oo ay wax ku soo iibsaneysa.

17. Arrinta go'aamisa in laga leexday nidaamka caadiga ah ee wax soo iibsiga ee sharcigu tilmaamay iyo inta ay la egtahay leexashadu ayaa ah "heerka ay mareeyso xaaladda degdega ah" ee wax loo soo iibinaayo (xaaladda degdega ah kadib, xilliga ka soo kabashada ama dib-udhiska). (Eeg shaxda 1 ee hoose).

⁴ Taarikhda lasoo saaray Hagahaan, Maamulka wali lama dhisin. Ilaa laga dhisaayo, Maamulka waxaa loola jeeda Waaxda libka ee Wasaaradda Maaliyadda.

18. Isticmaalka gelista qandaraaska tooska iyadoo lagu saleeynaayo xaalad degdeg ah, taas oo waafaqsan Qodobka 89 (1) ee Sharciga, waxaa hagaya go'aamada iyo ansixinta maamul ee lagu sheegay Lifaqa A ee Wareegtada.

19. Ka leexashada nidaamka iibsiga caadiga ah oo keliya ee lagu baneeyay oggolaanshada nidaamka iibka degdega ah ayaa loo isticmaali karaa wax iibsi (faqradda 10-aad ee Wareegtada).

20. Mabaadi'da aas-aasiga ee wax iibsiga guud - sida qiimaha ugu wanaagsan, tartan furan, hufnaan, fursadda oo loo simanyahay, caddaalad, daahfurnaan, daacadnimo iyo isla xisaabtan - ayaa lagu dabaqayaa iibka degdega ah, inkastoo ay macquul tahay in xaaladda markaas taagan ay muhiimad gaar ah siin karto wax ku oolnimada iyo wakhtiga ay qaadaneyso bixinta alaabta, dhismaha iyo adeegyada aadka loogu baahan yahay.

Qeybta II: Arrimaha muhiinka ah ee Nidaamka wax soo libsiga deg-dega ah

1. Qorsheynta iyo u diyaargarowga libka

A. *Wajiyada gurmadka dedega ah*

21. Libka degdega ah, oo ka mid ah gurmadka degdega ah ee guud, waa inuu noqdaa mid loo nidaamiyay qaab ka jawaabi kara xaaladda degdega ah ee markaa taagan oo ay kamid tahay xaaladda uu gurmadka degdegi ah markaas maraayo. Sidaa darteed, hawlahi iyo nidaamka iibka ee socda xilliga gurmadka degdega ah iyo inta ay la egtahay ka leexashada nidaamka caadiga ah ee wax-iibsiga (haddii ay jirto) waxa ay ku xirantahay gaar ahaan xaaladda ay mareeyso hawlahi gurmadka (eeg Wareegtada faqradda 11-aad iyo Shaxda 1-aad ee hoose)

22. Isticmaalka nidaamka iibka degdega ah ayaa muhiimad gaar ah u ah xilliga ay cusubtahay xilliga xaaladda degdega ah (gaar ahaan Wajiga 1-aad ee gurmadka ee la billaabo kadib xaaladda degdega ah). Markasta oo khatarta xaaladda degdega ah ay sii yaraato, waa inay sii yaraataa baahida loo qabo isticmaalka nidaamka iibka degdega ah, marka laga reebo xaaladaha qaar oo wali loo baahan yahay in wax si degdeg ah loo iibiyo.

23. Tusaale, kadib isla marka ay dhacdo musiibada, baahida loo qabo isticmaalka nidaamka iibka degdega ah iyo ka leexashada nidaamka iibka ee caadiga ah ayaa ah mid daruuri ah marka lala barbardhigo xilliga kasoo kabsashada iyo dib-u-dhisika.

Shaxda 1-aad ee Wajiyada Gurmadka Degdega ah iyo Nidaamka libkiisa

Wajiga Gurmadka	Shuruudaha	Tilmaamaha macquulka ah ee nidaamka iibka
Wajiga 1-aad: Musiibada marka ay dhacdo	<p>- Musiibada kadib, khatar ku aadan badqabka nafta, kaabayasha daruuriga ah iyo bey'ada.</p> <p>- Baahida loo qabo gurmad degdeg ah; gurmadka oo la daahiyo oo aan la aqbali karin.</p>	<ul style="list-style-type: none"> - "Ka-jawabi karta" hawlahaa wax soo iibsiga waa inay ahaadan kuwa ka jawaabi kara baahida markaa taagan. - In marba loo debciyo xannibaadaha nidaamka iibka sida ku haboon oo waafaqsan Wareegtada. - Qandaraas toos ah ama wax soo iibsi toos ah oo leh tartan, taas oo ku saabsan wax soo iibsiga muhiimka u ah ama daruuriga u ah gurmadka degdega ah, markii la oggolyahay (Lifaaqa A ee Wareegtada). - Dedejinta iyo isticmaalka nidaam la fududeeyay, haddii la oggolaado. - Oggolaanshaha hore in laga helo Guddiga Qandaraasyada (oggolaansho saameeyn tixanleh "blanket approval" ayaa la isticmaali karaa mararka qaar oo laga leexanaayo nidaamka caadiga ah) ayaa laga yaabaa in loo baahdo wajigaan. - Xulista qandaraaslayaasha hawlahaa iyo adeegyada si fudud u fulin kara.
Wajiga 2-aad Kasoo kabashada musiibada	<ul style="list-style-type: none"> - Khatar musiibada ka dhalatay ee saameyn karta nolosha, hantida, kaabayashaa, iyo bey'ada oo xoogaa yaraatay, taasoo oggolaanaysa hawlahaa gurmadka iyo soo kabashada. 	<ul style="list-style-type: none"> - Iisticmaalka nidaamka iibka degdega ah oo larabo inuu noqdo mid ku haboon xaaladda markaa jirta. - Tixgelinta nidaamyada kale ee wax iibsiga sida kireeysashada alaab muddo gaaban, isticmaalidda ama cusbooneysiinta heshiisyo horay u jiray (iyadoon waxba laga badaleyn daabacadda asalka ah ee qandaraaska), qandaraasyo guud (framework contracts).

Wajiga Gurmadka	Shuruudaha	Tilmaamaha macquulka ah ee nidaamka iibka
		<ul style="list-style-type: none"> - Mideeynta nidaamka wax soo iibsiga.
Wajiga 3-aad Dib-udhiska/ musiibada kadib	<ul style="list-style-type: none"> - Emergency situation has been stabilized to some extent, allowing response to focus on reconstruction - Xaaladda degdega ah oo ilaa xad xasishay, taasoo oggolaaneysa in xoogga la saaro dib u dhiska. 	<ul style="list-style-type: none"> - Nidaamka wax iibsiga oo lagu soo celsho mid caadiga ah (inkastoo tartan xadidan la isticmaali karo oo waliba marmar la oggolaan karo in hawsha iibka la dadajiyo (iyadoo lagu saleynaayo iibka tooska ah ee tartanka leh - Lifaaqa A ee Wareegtada). - “Dedejinta” wax soo iibsiga (boobsiinta, iyadoo la sameeyo tartanka; taas oo loo isticmaali karo kaabayaasha daruuriga ah).

24. Iyadoo la eegaayo xaaladaha kala duwan ee markaa ka jira gurmadka degdega ah, qiiimaha iyo shuruudaha kale ee qanaraasyada ayaa laga yabaa inay yihiin kuwo ku kala duwan musiibada kadib iyo waqtiyada dambe ee gurmadka degdega ahi uu muddo socday (dib u soo kabasho iyo dib u dhis). Sidaa darteed, ka leexashada shuruudaha iyo qdobada caadiga ah ee qandaraasyada ee kujira dukumintiga xayeeysiinta, ayaa la aqbali kara.

25. Waa in la oggadaa, iyadoo lagu saleeynaayo hadba xaaladda u qaaska ah xaaladda degdega ah ee markaa jirta, iyo dabeecadda iyo hadafka laga leeyahay wax soo iibsiga, inay jiri karaan in wajiyada kala duwan ee gurmadka degdega ah iyo nidaamka iibka ee loogu talagalay waji kasta ay isku mar hawl-galaan. Tusaale ahaan, meelaha qaar ee musiibadu haleeshay, khatarta ka dhanka ah badqabka nafta, caafimaadka, hantida iyo adeegyada aas-aaska ee Dawladda ayaa laga yaaba inay wali jirto, halka meelahaas qaarna xaaladda khatartu yaraatay.

B. Qiimeynya Xaaladda

26. Tallabada ugu horeeysa ee qorshaha iyo u diyaargarowga iibka degdega ah marka ay timaado xaalad degdeg ah oo xoogga saareysa arrimaha ugu muhiimsan ee taabanaya nidaamka iibka degdega ah (tusaale, dabeecadda, baaxadda iyo goobta xaaladda degdega ah, kaabayasha deeganka xaaladda degdega ahi kajirto, oo ay ka midyihin qalabka wax lagu raro ama lagu dejijo

ee meesha yaala (meelaha wax laga raro, gaadiidka wax rara iyo qalabka kale ee wax lagu raro, ama lagu keydiyo iyo kuwa lagu daabulo) (eeg Lifaaqa 2-aad, Wajiga 1-aad Liiska-hubinta).

C. Shaqaalahi iyo Awoodaha

27. Iyadoo la tix-gelinaayo dabeecadda, baaxadda adeegga, ballaca deeganka musiibadu saameysay iyo inta ay soconeysa nidaamka wax soo iibka degdega ah, hay'adaha ku shaqada leh hawlaho gurmadka degdega ah waa inay go'aamiyaan shaqaalahi ka hawl-galaya hawsha iibka ee loo baahan yahay, waliba qeexaan doorka, masuuliyadda loo wakiishay iyo meesha ay ka hawl galayaan, kadibna ay dhisaan kooxaha hawl-wadeenada ah ee dhaqangelinaaya hawlaho iibka. Sidaa darteed waxaa muhiim ah kor u qaadista iyo hubinta tayada iyo xirfada hay'adaha hawhoodu tahay go'aan ka gaarista shuruudaha wax soo iibsiga, qorsheynta, qandaraas sameeynta iyo bixinta iyo waliba maareynta qandaraasyada.

28. Sarkaalka Idman waa inuu siiyaa tilmaamo cad cad oo hawl-wadeennada iyo guddiyada fulina nidaamka wax soo iibsiga oo ay ku jирто xadeeyn kasta oo ku aadan masuuliyadaha loo idmaday.

D. Baaxadda libka

29. Hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay go'aamisaa baaxadda, oggolaanshiyaha loo baahan yahay iyo waqtiga la soo iibinaayo waxyaabaha gurmadka wajiyadiisa kala duwan u baahan yihiin oo ay ka mid tahay ka jawaabista musiibada marka ay dhacdo kadib, xilliga kasoo kabashada iyo xilliga dib-u-dhiska. Arrimaha saameynta ku leh inta ay la'egatahay waxa la soo iibinaayo, sida nuuca alaabta, dhismaha ama adeega loo baahan yahay si loo fidiyo gurmadka degdega ah, in isla markii laga heli karo oo ay diyaar ku yihiin suuqyada iyo in kale, baahida hay'adaha u baahan waxyaabaha lasoo iibinaayo, nuuca iyo baaxadda musiibada.

30. Si hawl-wadeenada loogu fududeeyo qorsheeynta wax soo iibsiga loogu tala galay gurmadka, Lifaaqa 3-aad waxa u tixayaa nuucyada waxyaabaha gurmadka degdega ahi u baahnaan karo.

31. Waxa loo soo iibinaayo gurmadka degdega ah waa inay ahaadaan inta ku filan si loogu guul gaaro hawlaho gurmadka. Si taa loo caddeeyo, baaxadda nidaamka iibka degdega ah waa inuu ku ekaadaa waxa loo baahan yahay oo keliya si looga jawaabo xaaladda degdega ah (oo ay ka mid tahay cadadka waxyaabaha loo baahan yahay iyo waqtiga hawshaasi soconeysa). Si looga hortago balanqaad wax soo iibsi ee aan loo baahneen, ku darista

qandaraaska qodob oggolaanaya in lasoo iibsan karo waxyabaha dheeriga ah ee muhiimad gaar ah u leh ayaa la soo kordhin karaa. Haddii lasoo iibsado wax ka badan inta gurmadka degdegi ah u baahan yahay, hay'adda wax soo iibsaneysa ma haboona inay isticmaasho nidaamka iibka ee degdega ah.

E. Uruurinta Xogta La iskala xiriirayo

32. Hey'adda wax soo iibsaneysa waa inay uruurisaa oo ay sidii nidaamka isgaarsiinta degdega ah iyo warbixinta kale ee daruuriga ah (tusaale, caqabadaha soo wajiji kara hawlaha, culeeysyada ku imaan kara daabulidda iyo saadka) saraakiisha fulinaysa hawlaha iibka iyo ganacsatada iyo qandaraaslayaasha.

F. Qorsha libka

33. Markasta oo ay macquul tahay, nidaamka iibka ee degdega ah waa in la sameeya oo keliya marka la diyaariyo qorshaha iibka:

- (b) Qorshuhu waa inuu tix-geliyaa qiimeyn ta baahiyaha oo ay sameeyeen hawl-wadeennada gurmadka degdega ah.
- (t) Qorshaha laftigiisa waala fududeeyn karaa, iyadoo lagu daraayo inta ugu yar ee loo baahay ee ku aadan shuruudaha farsamo, cadad iyo waqt ee la xiriira alaabaha, adeegyada ama dhismayaasha, qiyaasta qiimaha, nidaamyada macquulka ah ee wax lagu soo iibin karo, meesha hawsha laga qabanaayo, nidaamka qaybinta iyo arrimaha kale ee la xiriira hawlaha gaarsiinta gurmadka.

G. Maareynta Khataraha

34. Qorsheeynta iibka ee xiliyada gurmadka degdega ah waxa ay u baahan tahay in qiimeyn lagu sameeyo khataro kala duwan oo saameyn kara iibka loo baahan yahay in loo sameeyo gurmadka degdega ah. Khataraha dhici kara - kuwaa oo ku kala duwanaan kara nuuca ay yihii iyo baaxadooda, iyadoo loo eegaayo dabeeecada xaaladda degdega ah iyo wajiyada kala duwan ee gurmadka degdega ah ee iibka loo sameeynaayo - waxay u kala qayb samaan inta nuuc ee lagu tilmaamay Shaxda 2-aad ee soo socota:

Shaxda 2-aad: Qiimeynta khataraha ka dhanka ah niidamka iibsiga degdega ah iyo sida loo yareeyn karo

Khatarta	Tusaalooyinka lagu qiimeyn karo khatarta	Tusaalooyinka talaabooyinka la qaadi karo si loo yareeyo khatarta
Khatarta amniga	<p>Qiimeynta badqabka iyo aminga meesha laga hawl-galaayo ee musiibadu saameysay, tusaale:</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Jiritaanka miinooyin ama walxaha qarxa; ○ Musiibada dabiiciga sida daadka iyo dhul burburka kadib; ○ In hay'adda Rayidka ah ee Dawladda ay tagi karaan meesha; ○ In shirkadaha gaarka loo leeyahay ay ka hawli-gali karaan meesha oo ay ka qeyb -qaadan kara wax soo iibsiga hay'adaha Dawladda. 	<ul style="list-style-type: none"> ○ U kala qeybi, una kal qorhseey hawlahaa wax soo iibsiga adiga oo ku saleynaaya khatarta jirta; ○ Kaasho bulshada maxalliga ah; ○ Iisticmaal hay'adaha Qaramada Midoobay ee meesha ka hawl-gala.
Khatar sameeynta iibka nuucan ah	<ul style="list-style-type: none"> ○ Jiritaanka dukumintiyo fudud ee wax lagu soo iibsan karo. ○ Macquulnimada in la isticmaali karo cabir-qaadasho ku saleeysan wax-qabad; ○ Jiritaanka nidaamka ballanqaadka ee u hoggaansanaanta tartanka iibka 	<ul style="list-style-type: none"> ○ Xoogga saar inaad wax ka soo iibsato goobaha maxalliga ah; ○ Xoogga saar soo iibsashada alaabata caadiga ah ee la heli karo. ○ Diyaari dukumintiyo fudud iyo qandaraasyo wax lagu soo iibsan karo. ○ Allow alternative bids to provide innovation (e.g., flexible delivery schedules) ○ Fursad sii tartamayaal kala duwan si aad xal uga hesho dhibka imaan kara. ○ Ka tanaasulidda shuruuda damaanadda wax-qabadka.
Payment risk	<ul style="list-style-type: none"> ○ Macquulnimada in si toos ah lacagta loo siin karo 	<ul style="list-style-type: none"> ○ In la oggolaado lacag horumaris ah oo ka

Khatarta lacag bixinta	<p>qandaraasle-hoosadlayaasha.</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ In lacag mag-dhaw ah ay ka dhalaneyso lacag bixinta lala daaho. 	<p>badan midda caadiga ah ee la bixiyo.</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Bixinta qeyb weyn oo kamid ah lacagta lagu heshiiyay marka alaabta la soo raro.
Khatarta keenista alaabta	<ul style="list-style-type: none"> ○ In meelo lagu keeydiyo, kuwo lagu qeeybiyo iyo gaadiid qaadi kara ay jiraan oo waliba la yaqaano lana kireeyay. 	<ul style="list-style-type: none"> ○ In la hubiyo in qandaraaslayaasha ay gaari karaan meelaha alaabta la geeynaayo. ○ Hawl-gelinta qalabka Dawladdu leedahay si loo fududeeyo in alaabta la geeyo meeshii loo rabay.
Khatarta korjoogteynta	<ul style="list-style-type: none"> ○ Isticmaalka nidaamka iibka degdega ah si loo helo adeega lata-linta. ○ Whether NGO, civil society sectors are sufficiently organized to contribute to monitoring contract performance ○ In hay'adaha aan Dowliga aheyn, ururada bulshada rayidka ah 	<ul style="list-style-type: none"> ○ Isticmaalka hay'ado kale si aad u fuliso hawsha korjoogteynta (tusaale, shaqaaleeysiinta lataliye-yaal).. ○ Isticmaalka hay'adaha aan Dowliga aheyn ee maxalliga ah iyo ururada bulshada rayidka ah. ○ Isticmaalka tiknoolijiyada (mobeelada, masawirada uu qaado dayax-gacameedka)

H. Ka-talagelinta baaxdda bulshada ay khuseeyso

35. Inta la awodo, waa in laga tashtaa bulshada maxalliga ah ee musiibadu saameeysay arrimaha la xiriira qorsheynta iyo dhaqan-gelinta mashruuca oo ay ka mid tahay ka faa'iideysashada aqoonta ay u leeyihiiin arrimaha maxalliga ah si loo sameeyo qiimeyn fiican ee la xiriirta baahiyaha jira.

I. Wadooyinka wax lagu soo iibsan karo

36. Haddii waqtigu oggolyahay, hay'adaha wax soo iibsanaya waa inay qiimeyaan wadooyinka u furan oo ay wax ku soo iibsan karaan, oo ka koobnaan kara :

(b) Isticmaalka qandaraasyo horay ujiray iyo qandaraasyadda aan cayimneen: Si waafaqsan Wareegtada (faqradda 14-aad), ka hor inta aan la

billaabin nidaamka wax soo iibsiga degdega ah, hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay qiimeysaa inay macquultahay in la cusboonaysiin karo ama la kordhin karo waqtiga qandaraasyo horay ujiray. Qiimeeyntaan waa in la sameeya ka hor inta la billaabin nidaamyada wax soo iibsiga ee degdega ah. Haddii uu jiro heshiis dhagan-gal ah oo aan cayimneen (Framework Agreement) kaas oo si degdeg ah loogu soo iibsan karo alaabta, dhismayaasha ama adeegyada loo baahan yahay, waxaa haboon in marka hore la tixgeliyo isticmaalka qandaraaskaas jira.

Tillaabadaan kowaad ayaa muhiim noqon karta marka ay adag tahay in si sax ah loo qiyaaso qiimaha waxyaabaha loo baahan yahay iyo muddada ay qaadaneyso, si loo fidiyo gurmadi degdeg ah. Haddii qandaraas la kordhiyo, waliba maanka lagu haayo in la sii kordhiyo, waa in la isku dayaa in wax soo iibsi cusub ka billaabo intii marar badan la sii kordhin lahaa qandaraas jira. Tani ayaa keeneysa in waqtii kordhinta qandaraaska ay fursad u siido in la qabto wax soo iibsi tartan ku dhisan. Wax-kabadal kasta ee lagu sameeynaayo qandaraas horay u jiray waa inuusan waxba ka bedelin ujeedada asalka aheyd ee qandaraaska.

(t) Wax soo iibsi mideeysan: Hay'aduhu waxa ay sameeyn inay ka wada shaqeeyan nidaamka iibsiga si ay uga jaawabaan baahida gurmadi degdega ah (tusaale wax soo iibsi mideeysay) (Wareegtada faqradda 15-aad). Gaar ahaan, wajjiga 2-aad (kasoo kabashada), fursadaha ku aadan mideeynta wax soo iibsiga ee hay'adaha Dowladda iyo kuwa aan Dowliga aheyn waa in laga fikraa, oo haddii ay macquultahay la dhaqan-geliya.

(j) Nidaamka iibka ee la doortay: Tani waxay ka kooban tahay iyadoo loo hoggaan samaayo Sharciga (Qeybta IV iyo V) iyo Wareegtada nidaamka iibka ee ku haboon xaaladda markaa taagan iyo wajiga gurmadi degdeg ah uu maraayo.

I. Istimmaalka nidaamka iibka ee tartanka kooban - Sharciga (Qodobka 86.1(e)) ayaa ogol isticmaalka nidaamka iibka ee tartanka kooban si loo fidiyo gurmadi degdega ah. Istimmaalka nidaamkaan ayaa la tixgelin karaa wajiyada kala duwan ee gurmadi degdega ah sida ku cad Lifaaqa A ee Wareegtada. Nidaamka libka ee degdega ah ma oggolaanaayo in laga leexdo nidaamka caadiga ah ee degsan ee sharicgu u dejiyay in wax lagu soo iibsado. Balse, u isticmaalidda nidaamka iibka tartanka kooban hawlahu gurmadi degdega ah waxa ay u baahan tahay inay ka hesho oggolaanshiyo Guddiga Qandaraasyadda iyadoo waafaqsan Lifaaqa A ee Wareegtada.

II. Istimmaal qandaraaska tooska ah: Iyadoo loo hoggaamsamaayo (Qodobka 89.1(e)), waxaa la ogolyahay in la isticmaalo qandaraas bixinta

tooska ah marka ay jirto xaaladda degdega ah (markii xaaladda degdega ah ay aad u daran tahay ama aysan jirin wax tartami kara aysan jirin. Sharciga (Qodobka 105.1.b) ayaa oggolaanaya in la isticmaalo hal il oo keliya marka la soo iibsanaayo adeegyo la talin si" looga jawaabo musiibooinka iyo latalinta loo baahan yahay musiibada marka ay dhacdo kadib".

Isticmaalka qandaraaska tooska ah markii ay jiraan xaaladaha degdega ah waxaa ay u baahan tahay in marka hore laga helo oggolaanshiyo Guddiga Qandaraaska haddii waxa la soo iibsanaayo ay ka qiima badanyihii inta lagu xaddiday Xeer-nidaamiyaha. Nidaamyada oggolaanshiyaha ee u gaarka ah hay'adda wax soo iibsaneysa, iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 30.1(a) ee Sharciga, ayaa la dabaqayaa marka la istcimaalayo nidaamkaan wax soo iibsiga ee ka hooseeya xaddiga lagu cayimay. Haddi ay tahay adeeg la-talin, cidda oggolaanaysa waa guddiga iibka.

Qeypta III: Nidaamka la hirgeliyay ee iibka

Markii ay jirto xaalad adag, intii la isticmaali lahaa qandaraas bixinta tooska ah/isticmaalka iibka ee halka il (Qodobka 89.1(e) ee Sharciga) Wareegtau waxa ay u baahan tahay hay'adda wax soo iibsaneysa, inta ay macquul tahay, inay badiso tartanka. Tani waxaa la sameyn karaa iyadoo la isticmaalyo nidaamyada iibka sida tartanka furan, tartanka xadidan iyo soo gudbinta qiimaha - iyadoo la ogolyahay in wax aan badneen laga leexo/ama labadalo nidaamka caadiga ah ee loo isticmaalo nuucyadaas iibka ee kor ku xusan.

Hay'adda wax soo iibsaneysa waa inay dalbataa inay soo tartamaan qandaraaslayaal badan, inta markaas macquulka ah. Tani waa in loo sameeyaa qaab ku haboon oo u hoggaansan nidaamyada iibka ee lagu cayimay Oggolaanshiyaha libka Degdega ah :

- (b) Codsashada soo tartamid, iyadoo la isticmaalaayo codsi soo gudbin qiimo (RFQ) oo wax laga badalay.
- (t) Codsashada soo gudbinta dukumintiyada tartanka, iyadoo la isticmaalaayo nidaamka soo tartamid oo wax laga bedelay.
- (j) Soo iibsashada adeegyo latalin iyadoo la isticmaalaayo xulusaho ku saleeysan aqoonta iyo khibrada lataliyaha.

Markii qiimo, soo tartamid ama soo jeedin la codsado si looga bilaabo tartan iyadoo jirto xaalad oggolaaneysa in la isticmaalo qandaraas toos ah ama xulusho hal il ah (Sida uu qabo Qodobka 89.1(e) ee Sharciga) waxaa la dabaqaya nidaamka caadiga ah ee iibka, iyadoo la isticmaali karo:

(b) Nidaamka codsashada oo la fududeeyay - oo ay ka mid tahay ka tanaasulid shuruudaha xayeeysiinta iyo isticmaalida u soo gudbinta codsiga si af ah, markii ay jirto xaalad degdeg ah oo adag (Wajiga 1-aad) ama iibsashada yaryar, iyadoo larabo in dib laga soo daro qoraal.

(t) Dadejinta waqtiga tartanka - iyadoo la soo gaabinaayo waqtiga soo dirista qiimaha iyo dukumintiyada tartanka.

(j) Fududeeynta shuruuda dammaanadda.

(x) Iisticmaalidda dukimintiyada tartanka iyo qandaraasyadda, markii kuwaa ay soo bandhigaan hay'adda ku shaqada leh.

(kh) Ka tanaasulidda waqtiga cabasha sugidda markii tani ay baneeneysyo degdegnimada xaaladda.

Qeybta IV: Iisticmaalka awoodda Dowladda -

Nidaamkaan, hay'adda wax soo iibsaneysa waxay isticmaaleysa shaqaalaheeda iyo qalabkeeda (Qodobka 87.1(f) ee Sharciga). Iisticmaalka awooda hay'adda ma ahan in la hawl-geliyo shirkad, ha ahaato mid Dowladdu leedahay ama mid kale oo loo dhisay inay heshiis lagasho hay'adaha Dowladda. Iisticmaalka shirkadaha nuucaan ah waa in ay ahaadaan kuwa loo sameeyo si waafaqsan nidaamka iibka ee lagu dhigay Sharciga iyo Wareegtada.

Qeybta V : Bulshada maxalliga ah oo wax laga soo iibsanayo –

Tani waxaa kamida mashaariic ay bulshadu wado oo ay bulshadu si firfircooni uga qayb qaadanayso naqshadaynta iyo fulinta mashaariicda (Sharciga, Qodobka. 69.4).

37. Qodobbada la tixgelinaayo marka go'aan laga gaarayo nidaamka iibka ee la dabaqaayo:

i. Wejiga lagu dabaqi karo ee gurmadka degdega ah nidaamka wax iibsiga ee nuucan ah iyo musiibadu heerka ay gaarsiisan tahay.

ii. Nooca soo iibsiga iyo qiimaha heshiiska.

iii. Waqtiga wax soo iibsiga oo ku saleeysan baahida alaabta, shaqada ama adeegyada loo qabo iyo meesha looga baahan yahay.

iv. Tirada qandaraaslayaasha, ama adeeq-bixiyeyaalka jira iyo awooddooda ay ku dabooli karaan baahiyaha hay'adda wax soo iibsaneysyo ay qabto iyo waqtiga ay ku qaadank karto.

v. Ilaa inta ay macquul tahay, iyadoo loo eegaayo xaaladda jirta, in la hubiyo tartanka ugu macquulsan.

38. Isticmaalka kooban/xaddidan, qandaraasyada tooska ah/xulushada halka il (adeegyada la-talinta) ama nidaamka la qaatay ee iibka ee loo isticmaalayo gurmadka degdega ah waxa ay u baahnaan doonaan in Xafiiks Ra'iisul-Wasaaraha ama hay'adda waxa iibsaneysa shaaciso xaalad degdeg ah, waxayna kale oo ay u baahan kartaa ogolaanshiyada Guddiga Qandaraasyada, haddii qandaraasku ka sareeyo qiimaha la xadiday ee lagu cayimay Lifaaqa A ee Wareegtada, marka laga soo tago shuruudaha kale ee la xiriira in guddiga iibka iyo sarkaalka idman iyagu meel marinayan.

(b) Doorbidida Shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexdhedaadka ah ee maxalliga ah: Marka ay jirto xaaladda degdeggaa ah, qandaraaslayaasha maxalliga ah, qandaraasleyda iyo adeeg bixiyaasha ayaa laga yaabaa inay ugu wanaagsan yihin inay bixiyaan badeecadaha, shaqooyinka iyo adeegyada loo baahan yahay si looga jawaabo xaaladda degdeggaa ah. Sidaa darteed waa in la qiimeeyaa awooda suuqa maxaliga ah, waliba la kordhiyaa fursadaha ay ku heli karaan qandaraas shirkadaha ganacsiyada maxaliga ah, gaar ahaan Shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexdhedaadka (SMEs). Doorashada nuucaa ah oo kale waxa ay beegsan doonaan tartamayaasha ku nool ama ka ganacsada meelaha ay musiibadu ka dhacday. Gaar ahaan hay'adaha maxalliga ah loo isticmaali karo nadiifinta burburka ka dhashay musiibada dib-u-dhisika iyo hawlaha daabulidda alaabaha.

(t) Ka-qaybgalka deeq-bixiyayaasha iyo Hay'adaha aan Dowliga aheyn (NGOs): ilaa xad, deeq-bixiyeyaasha kale (oo ay ku jiraan hay'adaha Qaramada Midoobay) iyo/ama NGO-yada, kuwaas oo habraacooda wax soo iibsiga lagu dabaqi karo, waxay u badan tahay inay ku lug leeyihin maalgelinta iyo/ama fulinta soo iibsiga degdeggaa ah.

i. Sidaa darteed waxaa lagama maarmaan, iyada oo qayb ka ah qorsheynta soo iibsiga degdeggaa ah, in lala xiriiriyo oo lala shaqeeyo hay'adahaas.

ii. Xiriirinta iyo isku xirka deeq bixiyayaasha iyo NGO-yadu waa in lagu saleeyaa waxa ay dhab ahaantii qabanayaan ama

qorshaynayaan in ay qabtaan meesha musiibadu ka dhacday, halkii ay ku salaysnaan lahaayeen oo keliya maclumaadka guud.

iii. Ilaa xadka soo iibsiga degdega ah ay deeq-bixiyeyaashu maal-geliyaan, hay'adda wax soo iibsanaysa waxay u baahan tahay inay hubiso u hoggaansanaanta shuruudaha soo iibsiga deeq-bixiyeyaasha.

2. Habraaca nidaamka libka

A. *Bilaabidda habka wax iibsiga*

39. Tallaabada wax iibsiga ee ku salaysan xaaladaha degdegga ah waa in ay keentaa sabab ah in la galoo habraacyada degdega ah iyo sharaxaad kooban ah oo ku saabsan siyaalo kasta oo habka soo iibsiga la soo jeediyay uu uga baxayo hababka wax iibsiga ee caadiga ah, taasoo qayb ka ah maclumaadka la doonayo in ay ku jiraan Tallaabada Soo iibsiga Degdega ah (Lifaaqa B ee Wareegtada).

40. Waa in laga digtoonaado lagana fogaado soo iibinta aan laga baaraan-dagin lagana taxadarin, si loo hubiyo in si dhab ah loogu baahan yahay soo iibinta degdega ah ee la soo jeediyay oo ay wax ka tareyso gargaarka iyo gurmadka saameynta xaaladda degdegga ah ee jirta.

B. *Codsiga ka qaybgalka*

41. Casuumadda tartanka iyo dukumintiyada codsiga waa inay si qayaxan u sheegaan in dacwadaha wax iibsiga lagu sameeyay xaalad degdeg ah oo waafaqsan wareegtada.

42. Iyadoo la raacayo sharciga iyo wareegtada, wey bannaan tahay in aan la sameyn daabacaadda illaa inta la filanayo Oggolaanshaha Soo iibsiga Degdegga ah (eeg Lifaaqa A ee Wareegtada). Intaa waxaa dheer, soo iibsiga adeegyada la-talinta ee xaaladaha degdegga ah, Xeer-nidaamiyaha 48.3 waxa uu ogolaanayaa in la iska dhaafu daabacaadda ogeysiisyyada lagu raadinayo soo bandigidda xiiseynta in lagu soo daro liiska xulashada.

43. Nidaamka Sharcigu dhigaayo ee wax lagu soo iibsanaayo (Xeer-nidaamiye 32(1)(d)) waxa uu ogolaanayaa in casuumada la soo bandhigo ka hor inta aan la ansixin miisaaniyada, si loogu baaqsado dib u dhaca ku imaan kara dhammaystirka hannaanka wax iibsiga. Hase yeeshay, wax qandaraas ah lama geli karo ka hor ansixinta miisaaniyadda. Tani waxay noqon kartaa

arrin waxtar u leh hirgelinta soo iibsiga degdega ah ee lagu sheegay lifaaqa A ee Wareegtada.

C. Isticmaalka wax iibsiga elektarooningga ah

44. Soo iibinta degdega ah illaa xad waa inay noqotaa mid macquugal ah oo la hirgelin karo, lana fuliyaa iyada oo laga faa'iidaysanayo website-ka Hay'adda iyo haddii la heli karo, nidaamka dhexe ee wax iibsiga elektarooningga ah ee DFS.

D. Soo iibsiga hal-abuurka

45. Marka la dejinayo takhasusyada farsamo iyo tilmaamaha kale ee loogu baahan yahay wax soo iibsiga loogu gol leeyahay dalabka qandaraasyada, hay'adda wax soo iibsanaysa waa inay, inta ay suurtogal tahay iyada oo loo eegayo dabeeecadda wax iibsiga, ku tiirsanaato faafahinta waxqabadka ku saleysan takhasusyada xirfadeed, iyada oo ujeedku yahay helidda qiime u dhigma lacagta, kuwaasoo noqon kara xalal halabuur leh.

E. Qiimaynta tartanka qandaraasyada

46. Waa in la dajiyaa shuruudaha iyo halbeegyada lagu qiimeenayo tartanka qandaraasyada, waana in la sameeyaa habkii lagu qiimeyn lahaa, iyadoo la eegayo kordhintu qiimaha adeegga lagu bixinayo lacagta, iyada oo la raacayo shuruudaha qiimaynta ee la siiyay tartamayaasha ka qeyb galaysa tartanka.

i. Hay'adda wax soo iibsanaysa waa in ay hubisaa, marka la samaynayo halbeegyada iyo shuruudaha qiimaynta tartanka, in muhiimadda ugu weyn la siiyo arrimo kasta oo marka lagu daro qiimaha macno u sameenaya in la aqoonsado, lays barbardhigo, sidoo kalena la ogaado tartamayaasha xirfadda uleh (tusaale ahaan, waqtiga bixinta, goobta bixinta).

ii. In kasta oo ay tahay in ay si hufan, wax ku'ool ah iyo dhaqaale ahaanba uga faa'iidaysato hantida dawladda iyada oo la eegayo duruufaha degdega ah, cidda wax soo iibsanaysa loogama baahna in ay muujiso in ay gaartay qiimaha ugu sarreeya ee waxqabadka ay lacagta siisanayso.

iii. Sicirrada aan caadiga ahayn waa, marka laga reebo xaaladaha degdega ah, inay aqbalaad hore ka helaan Masuulka Oggolaanshaha.

F. Macquul ahaanshaha Qiimaha

47. Go'aaminta macquulnimada qiimaha waxa ay si gaar ah u khusaysaa soo iibinta degdega ah, gaar ahaan marka aysan jirin wax tartan-qandaraas ah ama la sameenayo tartan kooban.
48. Go'aaminta macquulnimada qiimaha ee tartanka kooban waxay ku lug leedahay falanqaynta macluumaadka soo socda, oo ay ku jiraan:
- (b) Sooyaalka iibsiga alaabta lamidka ah qandaraaskan oo ay sameysay hay'adda ama hay'ado kale, iyada oo la tixraacayo qiimaha lagu iibsaday iyo qiimaha hadda taagan taas oo loo arko inay macquul tahay.
 - (t) Isbarbardhigga qiyasta qiimaha cidda wax soo iibsaneysa.
 - (j) Isbarbardhigga qiimaha halbeegga qandaraaslahaa ee shaqada iyo heerka shaqada ee Soomaaliya.
 - (x) Isbarbardhigga kharashka shaqaalaha dibadda laga keenay iyo kharashka shaqaalaha gudaha.
 - (kh) Qiimayaasha dowladda ama cidda soo saartay alaabta iyo isbeddellada qiimaha ay ka tarjumayaan.
49. Intaa waxaa dheer in la tixgeliyo, in qiime ka sarreeya midka caadiga ah la bixin karo sababo la xiriira baahi taagan oo loo qabo alaabaha qaarkood ama in wax la gaarsiinayo goobo halis ah iyo xaaladaha kale ee u gaarka ah xaaladda degdega ah. Sidoo kale, hay'adda wax soo iibsanaya waa inay ka feejignaataa oo ay la socotaa noocyada iibka ee shakiga leh (gaar ahaan marka ay wax ku iibsaneysa qimo sare).
50. Shuruudda looga baahan yahay in laga helo alaab-qeybiyaha/qandaraaslahaa/la-taliyaha ayaa sidoo kale lagu dabaqayaa xaaladaha degdega ah.

G. Codsiga habraacyada dib u eegista cabashooyinka

51. Nidaamyada dib u eegista cabashooyinka ee sharciga (Qaybta VIII) ayaa lagu dabaqayaa xaaladaha soo iibsiga degdega ah. Si kastaba ha ahaatee, xoogaa dabacsanaan ah ayaa la oggol yahay xaaladaha degdega ah. Qodobka 68 iyo 74 ee sharciga waxa ay bixinayaa reebid ku saabsan xaaladaha deg-degga ah oo la xiriira shuruudaha muddada joojinta. Sharcigu

(Qodobka 165.7) waxa kale oo uu oggolaanayaa – iyaddoo la tixgelinayo danta guud ee xaaladaha degdega ah (sida masiibooyinka dabiiiciga ah iyo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka) -- ka dhaafida hakinta dacwadda soo iibsiga ee caadiyan ay keento u gudbinta cabashada Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista Cabashada. Dabacsanaanta noocan oo kale ah waa in la isticmaalo oo keliya haddii ay jirto duruuf.

3. Samaynta heshiisyada, qaabeynta iyo maamulka

52. Si looga jawaabo nooca xaaladda degdegga ah, iyo heerka wax-ka-qabashada degdega ah, hay'adaha wax soo iibsanaya waxay haystaan xulashooyin kala duwan oo ah qaabka, samaynta iyo waxyaabaha ay ka koobnaanayaan qandaraasyada.

A. Qaabka qandaraaska

53. Qandaraaska waa inuu ku habboon yahay ujeedka loo sameenayo, iyadoo la tixgelinayo arrimo ay ka mid yihiin dabeecadda iyo inta la filayo inay sii jirto xaaladda degdegga ah, mawduuca iyo qiimaha qandaraaska tartanka suuqa, xaaladaha dhagaale ee jira iyo dukumeentiga qandaraaska ee la heli karo si ay u isticmaalaan cidda wax soo iibsaneysa. Iyada oo ay ku xiran tahay duruufaha, haddana waxyaabaha suurtagalka ah in la isticmaalo waxaa kamid ah:

(b) Iyadoo la raacayo wax kasta oo xaddidaya qiimaha lagu dabaqo oggolaanshaha marka la sameenayo wax soo-iibsiga degdegga ah, soo-iibsiga iyadoo la adeegsanayo codsiyada qiimaha adeegga (request for quotation) ama hababka heshiiska tooska ah, waxaa laga yaabaa inaan loo baahnayn qandaraas qoran; Iisticmaalka agabka sida dalabaadka iibka ama qaansheegyada kuwan oo laga yaabo inay ku filnaato buuxinta shuruudaha dukumeentiga ee sharciga.

(t) Qandaraasyada wakhtiga-iyo-agabka iyo kuwa ku saleysan saacadaha shaqada.

(j) qandaraasyada qiimaha go'an VS qandaraasyada qiimahooda laga gorgortamo.

(x) Qandaraasyada Xaashida -- qandaraasyada hordhaca ah ee laga yaabo in la isticmaalo marka cidda wax soo iibsaneysa ay u baahan tahay bixinta alaaboo degdeg ah, adeegyo ama hawlo, islamarkaana aysan jirin waqtii lagu sameeyo qandaraas qayaxan ka hor inta aan waxqabadka la billaabin.

Qandaraaska xaashida waa inuu ka kooban yahay jadwal si loo qeexo heshiiska (sida, sheegidda faahfaahinta) kaas oo, marka laga reebo xaaladaha aadka u daran, lagu dhammeystiri karo Saddex [3] maalmood, ama ka hor inta boqolkiiiba Afartan [40] waxqabadka qandaraaska la dhammeystirayo, hadba kii soo hormara.

54. Qandaraasku waa in uu qeexaa muddada heshiiska ee la cayimay, iyada oo la eegayo in laga fogaado dib-u-dhac ku yimaada waajibaadka qandaraaska si wax looga qabto xaaladda degdeggaa ah. Qodobbada heshiisku waa inay sidoo kale xaqijiyaan xaqaa ay hay'adda wax soo iibsanaysa u leedahay inay joojiso wax iibsiga si waafaqsan qandaraaska, taas oo ay kamid taha xaqaa hay'adda wax soo iibsanaysa u leedahay inay soo gaba-gabeysa qandaraaska si isla-oggol ah (qod. 77 ee sharcigan).

55. Ilaa inta la heli karo lana dabaqi karo, hay'adda wax soo iibsanaysa waa in ay isticmaashaa foomamka caadiga ah ee dokumentiyada codsiga wax-iibsiga iyo shuruudaha qandaraaska, oo ay ku jiraan daabacado la fududeeyay ee loo isticmaalo soo iibsiga degdeggaa ah.

56. Waa in laga taxadaraa marka heshiiska lagu darayo lana qorayo qodobbada ‘saameyn ta awoodaha rabbaaniga ah’ (*force majeure*), iyadoo la eegayo nooca xaaladda degdeggaa ah ee lagu sameynayo soo iibsigan.

57. Qandaraasku waa in aanu samayn qeybiye (supplier) gaar ah.

B. Lacag Bixinta

58. Dabacsanaanta suurtgal ka ah ee loo sameenayo qandaraaslaha/qaybiyaha waxa ay noqon kartaa in la siiyo heerar sare oo lacag hormaris ah.

59. Caddeyn ta lacag-bixintu waa inay u hoggaansanaantaa shuruudaha diiwaan-gelinta qandaraaska.

60. Istimkaal ka lacag-bixinta elektarooniga ah (e-payment) ayaa ah habka fiican, haddii ay suurtgal tahay. Xaaladaha qaarkood, isticmaalka lacagaha mobillada ayaa habboonaan kara.

C. Kormeerka fulinta heshiiska

61. Isticmaalka teknoolajiyada (tusaale, geotagging, satellite imagery, mobile technology) waxa ay fududayn kartaa la socodka fulinta qandaraasyada wax iibsiga ee xaaladaha degdegga ah.

62. Inay dhinac saddexaad kormeerto oo ay la socoto fulinta qandaraaska, gaar ahaan bulshada rayidka ah, waxay gacan ka geysan kartaa xaqijintu ujeedka soo iibsiga degdegga ah. Hay'adaha soo iibintu waxay awood u siin karaan bulshada rayidka ah inay helaan maclumaadka iyo jawaab celinnada, iyagoo isticmaalaya aaladaha internetka, warbaahinta bulshada iyo tiknoolajiyadda moobeelka gacanta.

Qeypta: IV: Ka-bixidda marxaladda soo iibinta degdegga ah

63. Haddii xaaladaha degdegga ahi ay dagaan oo ay fududaadaan, waa in la joojiyo isticmaalka hababka soo iibsiga xaaladaha degdegga ah. Nidaamyada soo iibsiga degdegga ah ee la qaatawaxaa la adeegsan karaa marxalado dambe oo wax loogu qabanayo xaaladda degdegga ah sida dib-u-dhiska kaabayaasha muhiimka ah (tusaale, ceelasha biyaha, bulaacadaha, tamardhalinta iyo qaybinta).

64. Howlaha ka-bixidda waxaa kamid noqon kara joojinta iibka hoos yimaada hal ama dhowr qandaraas, iyo sidoo kale haddii suurtagal tahay, wareejinta alaabaha saa'idka ah ama kuwa aan la isticmaalin, dib u kaydinta alaabaha loo adeegsado xaaladaha degdegga ah, iyo qiimaynta howlaha soo iibsiga degdega ah iyo casharrada laga bartay.

Daahfurnaan iyo Isla-xisaabtan

1. Daahfurnaan

65. Mabda'a aasaasiga ah ee soo iibsiga ee ah in loo fuliyo si hufan oo daahfurnaan leh ayaa sidoo kale ku dabaqmeysa soo iibsiga degdegga ah.

- i. Sidaas awgeed, habka soo iibsiga degdegga ah waa inuu noqdaa mid daah-furan oo si habboon loo diiwaan-geliyo.
- ii. Waa lama horaan in go'aannada la diiwaan-geliyo si loogu sharaxo si waafi ah duruufaha iyo sababaha loo cuskanayo habraacyada soo iibsiga degdegga ah.

- iii. Waa in la sameeyo lana dhowro diiwaanka hawlaho wax iibsiga iyo go'aamada la xiriira iyo sidoo kale galalka qandaraasyada.
66. Marka laga soo tago ujeedooyinka daah-furnaanta, diiwaannada wax iibsiga iyo galalka qandaraasyada waxa ay lagama maarmaan u yihiin maareynta heshiisyada. Waxa kale oo ay sahlaan u diyaargarowga xaaladaha degdega ah ee mustaqbalqa, dib u eegis, xisaab hubin, baariitaano, sidoo kale dib-u-eegista, hanti-dhowrka iyo la socodka xaaladaha soo iibsiga degdega ah.
67. Qoraalka dukuminti ee habka soo iibsiga degdega ah waa inuu ka koobnaadaa:
- (b) Oggolaanshaha lagu galayo soo iibsiga degdega ah (Sarkaalka Oggolaanshaha iyo, ilaa xadka lagu dabaqi karo, ku dhawaaqidda Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha iyo/ama ansixinta Guddiga Qandaraasyada).
 - (t) Dabeecadd iyo baaxadda soo iibsiga.
 - (j) Sababta soo iibsigu muhiim u yahay, dabeecadda iyo heerka ay gaarsiisan tahay xaaladda degdegga ah, iyo duruufaha loogu baahan yahay soo iibsiga degdegga ah.
 - (x) Goobta alaabaha, hawlaho ama adeegyada looga baahan yahay.
 - (kh) Nooca habka wax iibsiga ee la isticmalayo iyo sharraxaadda dhammaan waxyaabaha la bixinayo iyo tallaabo kasta oo loo qaadayo in la sameeyo tartan lagu galo soo iibsiga.
 - (d) Aqoonsiga alaab-qeybiyeeyasha, qandaraaslayaasha, la-taliyayaasha laga dalbaday dalabaadka iyo tixraaca liiska/diiwaannada iibiyeyaasha la ansixiyay.
 - (r) Qiimaha soo iibsiga.
 - (s) Dalabaadka adeeg la soo gudbiyay.
 - (sh) Shuruudaha iyo habraaca qiimaynta, isbarbardhigga iyo heerka dalabaadka.
 - (d) Nooca qandaraaska (oo ay ku jirto habka qiimaha, muddada, qiimaha go'an ama midka laga gorgortami karo).
 - (dh) Waqtiga la fulinayo qandaraaska.

(k) macluumaadka tillaabooinka muhiimka ah, go'aamada iyo dhacdooyinka marka la hirgelinayo qandaraaska soo iibsiga.

(m) Warbixinta soo iibsiga degdega ah, oo ay ku jirto macluumaadka lagu xusay xarafyada (a) ilaa (l), si waafaqsan sharciga (Qod. 31.2).

68. Shuruudaha keeydinta dukumitiyadda ee lagu tilmaamay Sharciga (Qodob 31.1) ayaa lagu dabaqayaa nidaamka wax soo iibsiga degdega ah.

69. Shuruudaha qoraalka iyo daabacaadda iyo iyadoo la raacayo sharciga iyo shuruucda khuseeya go'aamada heshiiska iyo natijada dacwadaha soo iibsiga ayaa lagu dabaqayaa soo iibsiga degdegga ah. Intaa waxaa dheer, dhammaan qandaraasyada la bixiyo iyadoo la adeegsanayo hababka soo iibsiga degdegga ah ee qiimahoodu ka sarreeyo [\$ 500,000] waa in si buuxda loo daabacaa iyadoo ay ku jirto qiimaha qandaraaska iyo qodobbada lacag bixinta iyo gaarsiinta.

70. Shuruudaha dukuminti qoraalka ayaa sidoo kale la dabaqayaa marka la adeegsado habka go'aanka xoogga la isticmaalo.

71. Marka soo iibsigu ay maal-gelinayaan deeq bixiyayaasha, dukumeentiyada waa la diiwaan-gelinaya loona gudbinayaan deeq bixiyaha. Wuxaan kamid ah caddaynta xayaysiisyada ama dalabaadka adeegga, caddaynta iibsashada (dalabka iibka, iwm.); caddaynta lacag bixinta iyo dukumeentiyada kale ee laga yaabo in lagu qeexo shuruudaha deeq bixiyaha.

3. Isla xisaabtanka

72. Cadaadisyada dheeraadka ee xaaladda degdegga ah si loo gaarsiiyo si dhakhso ah ayaa kaga sii dari karta saraakiisha wax soo iibsiga iyo alaab-qeybiyeasha, marka ay samaynayaan soo iibsiga si wanaagsan. Anshaxa, iska hor'imaadka danaha, mabaadi'da iyo xeerarka lagu dabaqayo soo iibsiga guud ayaa sidoo kale lagu dabaqayaa soo iibsiga degdegga ah.

73. Caqabadaha dheeraadka ah ee lagala kulmay ka hor maaraynta soo iibsiga degdega ah, waxay muujinayaan muhiimadda ay leedahay dib u eegis iyo hantidhawr hore, iyo waajibaadka la shaqaynta habraacyadan.

74. Habka dalabka qandaraasyada iyo bixinta qandaraasyada soo iibsiga waa inay u hoggaansamaan nidaamka dib u eegista cabashada. Si kastaba ha ahaatee, muddada joojinta iyo qodobbada hakinta waa la dhaafi karaa (qodobada. 68, 74, 165.7; Wareegtada, Lifaaqa A).

75. Toban [10] maalmood gudahooda laga bilaabo dhammaystirka soo iibsiga degdega ah oo ay ku jирто fulinta qandaraaska ama kadib marka lasoo gabagabeeyo qandaraaska, sarkaalka awoodda u leh waa inuu u soo gudbiyaa Hay'adda warbixin ku saabsan habka ay ku jiraan maclumaadka ku xusan cutubka 67. Qaab-dhismeedka loo isticmaalayo warbixinta waxaa lagu sheegay lifaaqa 4. Samaynta warbixintu waxa ay buuxinaysaa shuruudaha diyaarinta warbixinta lagu sheegay sharciga (Qodobka. 31.2).

76. Shaacinta warbixinta soo iibsiga deg-degga ah waxay ku xiran tahay xeerarka lagu tilmaamay sharciga (Qod. 31.6 iyo 7), mutatis mutandis.

Qeybtav: U diyaargarowga soo iibsiga kahor xaaladaha degdegga ah

77. Ka hor inta aysan imaan xaalad degdeg ah, waa in hay'adaha iyo maamullada dhexe ee awooda u leh ay qaadaan tillaabooyin loogu diyaar garoobayo soo iibsiga wax loogu qabanayo xaaladaha degdegga ah, laguna yareenayo dib u dhac imaan kara.

78. Tallaabooyinka la qaadi karo si loo kordhiyo diyaar garowga soo iibsiga degdegga ah waxaa ka mid ah:

(b) Qiimaynta casharradii iibsiga ee laga bartay xaaladihii degdega ahaa ee hore (iyada oo la tix-gelinayo nooca xaaladaha degdega ah iyo baahiyaha la xiriira, habraacyada la isticmaalay, qoondaynta doorarka iyo masuuliyadaha, maal-gelinta wax iibsiga la xiriira, isticmaalka qandaraasyadii hore, caqabadaha saadka ee lagala kulmay bixinta sahayda, adeegyada, xalalka lala isticmaalay, xog uruurinta, kormeerka fulinta qandaraaska iyo cabbirka).

(t) Iskudaridda hawlah iibsiga ee musiibada qaranka iyo qorshaha maareynta khatarta.

(j) Qeexidda shaqooyinka muhiimka ah, doorarka iyo mas'uuliyadaha go'aan gaarista, ansixinta iyo hirgelinta soo iibsiga degdegga ah iyo isu imaatinka maclumaadka xiriirka (oo ay ku jирто cusboonaysiinta xilliyeed).

(j) Qoondedyda iyo garashada agabka xarumaha wax iibsiga degdegga ah iyo kooxaha.

(x) Nidaamyada la dardar geliyay ee wax ka beddelka ergada hay'adda si loo xoojiyo ka-jawaabta degdegga ah ee soo iibsiga, gaar ahaan marka ay musiibado dhacdo.

- (kh) Abuurista koox khubaro wax-iibsi ah oo leh xirfadaha iibsiga degdeg ah si dhaqso u rara waxyaabaha degdega ah ee la doonayo.
- (r) La xiriirka deeq-bixiyeyaasha iyo NGO-yada laga yaabo inay ku lug yeeshaan wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah.
- (s) Suuragelinta isticmaalka mareegtada dhexe ee wax-iibsiga internetka ee DFS iyo nidaamka wax iibsiga elektarooningga ah.
- (sh) Diyaarinta iyo soo saarista qaababka qandaraasyada iyo dokumentiyada soo iibsiga degdega ah, foomamka iyo galalka si loo adeegsado inta lagu guda jiro nidaamka wax iibsiga.
- (d) Qiimaynta waxa loo baahan karo in la soo iibyo iyo caqabadaha saadka ee laga yaabo in lala kulmo iyadoo la tix-gelinayo qiimaynta habraacii lagu dabaqay xaaladihii degdega ahaa ee hore iyo natijjooyinka la gaaray.
- (dh) Horey u-aqoonsiga alaab-qeybiyeyaasha/qandaraaslayaasha/lataliyayaasha bixiya badeecadaha, shaqooyinka iyo adeegyada (ay ku jiraan adeegyada gaadiidka) kuwaas oo laga yaabo in si adag loogu baahdo jawaabta degdegga ah (in la cusboonaysiyo xilliyo).
- (k) Samaynta heshiisyo qaabaysan oo lagu iibsanayo wsxyaabo gaar ah marka ay soo ifbaxdo xaaladda degdegga ah.
- (m) Diyaarinta iyo meeleynta agabka hawl-gelinta xirfadlayaasha wax iibsiga (si gaar ah nuqlka Wareegtada iyo hagahan, aaladda wireless-ka, laptop-ka, liiska lambarrada xiriirka muhiimka ah iyo iiimeellada, qariidada goobta iyo dulleeyadeed, nooca faylasha qandaraasyada taas oo ku jирто qandaraasyo maran iyo foomamka kale ee loo baahan yahay si loo habeeyo soo iibsiga).
- (n) Iyadoo loo eegayo horumarinta isla-xisaabtanka bulshada, samaynta habab lagu hawl-gelinayo taloooyinka bulshada rayidka ah u diyaargarowga soo iibsiga degdegga ah iyo la socodka fulinta soo iibsiga degdegga ah.
- (h) Samaynta tababaro joogto ah oo ku saabsan hababka iyo qaababka soo iibsiga degdegga ah.

QeybtVI. Qiimaynta soo iibsiga degdega ah

79. Hoos waxaa ku xusan tiro shuruudo ah/KPI oo lagu qiimeeyo waxqabadka soo iibsiga degdega ah ee heer kasta oo silsiladda wax iibsiga ah. Qiimayntan, oo ah qayb muhiim ah oo ka mid ah casharrada laga bartay waayo-aragnimada, waa in la sameeyaa kadib markii la dhammeystiro habka wax iibsiga oo ay ku jiraan fulinta qandaraasyada. Gaar ahaan, waxay la xiriirtaa Hay'adda markay qiimaynayso guud ahaan u hoggaansanaanta hay'adaha iibinta ee qaab-dhismeedka soo-iibsiga oo ay kamid yihin Wareegtada iyo Hagidaan.

1. Qorshaynta

80. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriira qorshaynta soo iibsiga degdega ah waxaa kamid ah:

- (b) Aqoonsiga shuruudaha (marka la eego baaxadda iyo tirada) sax ma ahayd mana habboonayd?
- (t) Maalgelin ku filan ma la siiyay soo iibsiga degdegga?
- (j) Qandaraasyada jira ama qaabdhismedka heshiisyada cidda wax soo iibinaysa, ama kuwa hay'adaha kale, ma la helay?
- (x) Doorashada nooca qandaraas maku habboonayd ujeedka?

2. Habraacyada soo-iibsiga

81. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriirta habraacyada soo-iibsiga degdega ah waxaa kamid ah:

- (b) Ogaysiisyada ma lagu faafiyay internetka?
- (t) Dalabyada shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexe (SMEs) ee maxalliga ah mala weydiiyay?
- (j) Marka soo iibsiga la sameeyay iyadoo laga saaray habraacyada caadiga ah, heerka u tartanka ma la gaarsiiyay ilaa inta suurtagalka ah?
- (x) Qaab-dhismeedka qandaraasyada maloo dejiyay si waafaqsan shuruudaha soo-iibsiga degdegga ah ee soo noqnoqda?

(e) Qandaraaska maloo galay si waafaqsan siyaasadda u dhiibidda ergada shirkadaha ku habboon?

3. Maareynta qandaraaska

82. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriira maaraynta qandaraaska soo-iibsiga degdega ah waxaa kamid ah:

(b) Mas'uuliyadda maareynta qandaraasyada si waafi ah ma loo cayimay?

(t) Fulinta qandaraasyada si wax ku'ool ah ma loo kormeeray?

(j) Waxyaabaha qandaraaska mala gaarsiiyay goobihii saxda ahaa, tiradii lagu heshiiyay, waqtigii loogu talagalay, iyo/ama shuruudaha kale ee fulinta qandaraaska mala buuxiyey?

(x) Lacag-bixinta qandaraaska ma la sameeyay waqtii ku habboon?

4. Daah-furnaanta iyo Isla-xisaabtanka

83. Tusaalooyinka tilmaamayaasha qiimaynta ee la xiriirta daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka soo iibsiga degdegga ah waxaa kamid ah:

(b) Habka soo-iibsiga si habboon ma loo diiwaan-geliyay?

(t) Mala dabaqay ansixintii ku habbooneyd iyo hababka la-socodka wanaagsan?

(j) Bulshooyinka ay saamaysay xaaladda degdegga ah maku qanceen adeeg bixinta?

Lifaaqa 1 Wareegtada Soo iibsiga Degdegga ah

Wasaaradda Maaliyadda

Wareegtada soo iibinta degdega ah

1. Wareegtadan waxa lagu soo saaray si waafaqsan qodobka 15(2) ee Sharciga iibka iyo qandaraasyada Qaranka (halkan loogu yaqaanno "Sharciga"). Waxay qeexaysaa shuruudaha lagu go'aaminayo marka soo iibsiga degdega ah ee waafaqsan Sharciga libka la samayn karo waxayna qeexaysaa habraacyada fulinta soo iibsigaas. Wasaaradda Maaliyadda ("Wasaaradda") waxa ay cusbooneysiin doontaa Xeerarka libka si ay u taageerto hirgelinta iyo dhaqan-gelinta Wareegtadan.

QEYBTA A: Marka la isticmaali karo soo-iibsiga degdegga ah

2. Sharciga waxa uu ka baaraan degayaa in habraacyadaa soo-iibsiga ay u baahan yihii la-qabsiga xaaladaha degdega ah. Xaaladaha degdegga ah waxay ka iman karaan dhacdooyin aan la saadaalin karin oo aan ahayn natijada fal ay dib u dhigi karto dhinaca Hay'adda iibinta. Noocyada xaaladaha ama dhacdooyinka soo socda waxay baneyn karaan in la isticmaalo hababka soo-iibsiga degdegga ah:

(b) Masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa dad-sameyska ah (tusaale, masiibooyinka deegaanka, la'aanta kaabayaasha muhiimka ah iyo agabka, xasaradaha caafimaadka bulshada oo ay ku jiraan cudurrada safmarenka ah iyo cudurrada sida baahsan u faafa, xaaladaha degdegga ah ee siyaasadeed sida dagaallada iyo kacdoonnada rayidka).

(t) Xaaladaha amni ee degdegga ah ee ka dhasha falal dagaal, kacdoon ama argagixisanimo, iyo

(j) Dhacdooyinka aan la filayn, kuwaas oo aysan suurtagal aheyn inay wax ka qabtaan hay'adaha DFS ama aysan ka bixin karin adeegyada muhiimka ah.

3. Xaaladaha ku xusan farqadaha 2 (b) iyo (t), Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha oo kaliya ayaa ku dhawaaqi kara in duruufahaas ama dhacdooyinkaas ay dhaceen. Xaaladaha lagu sheegay farqada 2 (j), Hay'adda iibinta, iyada oo adeegsanaysa sarkaalkeeda oggolaanshaha, waxay ku dhawaaqi kartaa jiritaanka duruufahaas ama dhacdooyinkaas. Marka ku dhawaaqidda ay sameeneysa Hay'adda iibinta, Sarkaalka Oggolaanshaha waa inuu diiwaan-

geliyaa ku-dhawaaqidda ka hor oggolaanshaha habraacyada soo iibsiga degdegga ah, sida lagu qayaxay Qayta B ee Wareegtadan.

QEYBTA B: Oggolaanshaha soo-iibsiga degdega ah

4. Marka ay jirto xaaland degdeg ah iyo haddii danta guud ay dalbaneysso, isticmaalka hababka soo- iibsiga degdega ah waxaa codsan kara waaxda ka faa'iidaynsiga ee Hay'adda iibinta. Codsiga waa in lagu sameeyaa qoraal waana in lagu caddeeyaa:

(b) Duruufaha jira ee oggolaanaya isticmaalka hababka soo iibsiga degdegga ah, ha noqoto xaaland degdeg ah oo uu ku dhawaaqeyso Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha ama sarkaalka oggolaanshaha sida ku xusan faqradda 3-aad;

(t) Baaxadda, kala-horreysiinta iyo waqtiyeynta soo iibsiga ee loo baahan yahay si waafaqsan marxaladda xaaladda degdegga ah. Marxaladaha xaaladda degdega ah waxaa lagu soo koobay faqradda 11-aad; iyo

(j) Sharaxaad kooban oo laga bixiyo soo-jeedinnada soo iibsiga caadiga ah ee laga leexday. Waxyabaha laga leexday ee habraacyada soo iibsiga caadiga ah waxaa lagu sii sheegay faqradda 12-aad iyo lifaaqa A.

5. Oggolaanshaha in la dhaqaajiyo habraacyada soo iibsiga degdega ah waxaa bixin kara sarkaalka oggolaanshaha ee Hay'adda iibinta ay khusayso, marka soo iibsiga degdegga ah uu kayar yahay \$100,000, ama Guddiga Qandaraasyada, wixii ka badan xaddigaas. Hay'adaha iibinta waxaa la xasuusinayaa in aan loo ogolayn inay kala qaybiyaan soo iibinta ujeedooyinka loogu baxsanayo tartanka iyo shuruudaha kale ee soo iibsiga (Sharciga 27.5).

6. Qaabka ay Wasaaraddu u soo saartay ee Lifaaqa B waa in loo istcimaalaa codsiyada isticmaalka soo iibsiga degdega ah si waafaqsan Wareegtada. Qaabka lagu soo saaray lifaaqa C waa in loo adeegsadaa oggolaanshaha isticmaalka soo iibsiga degdegga ah.

7. Marka soo iibinta degdegga ah ay u baahan tahay oggolaanshaha Guddiga Qandaraasyada, Guddigu waa inuu tix-geliyaa nuxurka codsiga oo ay siiyan aqbalaad qoraal ah shan maalin oo shaqo gudahood. Ansixinno maran ayay soo saari karaan Guddiga Qandaraasyada, kuwaas oo loo isticmaalayo noocyada haraacyada soo iibsiga ee loogu jawaabay xoalad degdeg ah oo cayiman.

8. Shaqooyinka loo xilsaaray Guddiga Qandaraasyada ee ku cad faqradaha 5 iyo 7 waxay dheeraad ku yihiin hawlahu guddiga qandaraasyada ee ku xusan Xeer-hoosaadka libka. Si loo taageero Guddiga Qandaraasyada, waxaa la sameyn karaa guddi farsamo marka loogu baahan yahay xaalado gaar ah oo degdeg ah, si ay u dabagalaan fulinta siyaasadda soo iibsiga degdega ah, waxaana kamid noqonaya khubaro aqoon iyo farsamo durugsan u leh baahiyaha ka-jawaabista xaaladaha degdega ah, si markaa soo iibsiga si degdeg ah loo meelmariyo.

9. Marka oggolaanshaha la helo iyadoo la raacayo shuruudaha Wareegtadan, soo iibsigu waa inuu u socdaa si waafaqsan habka (hababka) wax iibsiga ee la oggolaaday. Oggolaasho kasta oo soo iibsi degdeg ah waa inay Hay'adda iibinta ku soo wargelisaa Waaxda libka ee Wasaaradda sida ugu dhakhsaha badan kadib marka la soo saaro. Dhammaan marxaladaha iyo wakhti kasta, soo iibsiga degdega ahi waa inuu ku xaddidnaadaa tirada badeecada iyo/ama adeegyada loo baahan yahay in wax loogu qabto xaaladda degdega ah.

10. Lama ogola in laga leexo habraacyada soo iibsiga caadiga ah ilaa si gaar ah loogu xuso qoraalka oggolaanshaha. Waa in la dhaqan-geliyaa shuruudaha faafinta go'aannada qandaraaska, sida uu dhigayo Sharciga 24.1, iyo ansixinta Guddiga Qandaraasyada ka hor inta aan la saxixin in ka badan xaddi gaar ah, sida uu dhigayo Xeer-nidaamiye 18.2.

QEYBTA C: Habraacyada soo-iibsiga degdega ah

11. Marxaladda ay mareyso xaaladda degdega ah ayaa go'aamineysa nooca habraac ee soo iibsiga degdega ah ku habboon kaas oo qoraalka oggolaanshaha lagu codsaday, gaar ahaan marka la eego waxyaabaha laga leexanayo ee kamid ah hababka soo-iibsiga caadiga ah. Marxaladahan waxaa kamid ah:

Marxaladda 1-aad – kadib islamarka ay dhacdo musiibada ama nooca kale ee xaaladda degdega ah ee khatarta degdega ah galineysa nolosha, kaabayaasha muhiimka ah, deegaanka iyo baahida ka-jawaabista degdega ah;

Marxaladda 2 – Marxaladda gurmadka/soo kabashada, taas oo khatarta degdega ah ee ku wajahneyd nolosha, hantida, iyo kaabayaasha deegaanka ay hoos u dhacday ilaa xad;

Marxaladda 3 – Marxaladda dib-u-dhiska/ musiibada kadib, taas oo xaaladda degdega ah la dejiyay ilaa xad, islamarkaana saamaxeysa in diiradda la saaro dib-u-dhiska.

12. Ka leexashada habraacyada soo iibsiga caadiga ah ee lagu soo jeedin karo codsiga soo iibsiga degdega ah, iyadoo loo eegayo marxaladda xaaladda degdega ah iyo qiimaha la filayo ee qandaraaska in lagu bixiyo, waxaa kamid ah:

- (b) Iisticmaalka dokumentiyada soo iibsiga jyo qandaraasyada ee diyaarsan;
- (t) Dejinta waqtiyo ku habboon in lagu xaqijiyo soo gudbinta Codsiga qiimaha adeegga, tartanka ama soo jeedinnada; iyo,
- (j) Laalidda muddada hakinta heshiiska marka ay lama huraan u tahay baahida degdega ah.

Lifaaqa A wuxuu bixinaya hagid faahfaahsan oo ku saabsan habraacyada ku habboon iyadoo loo fiirinayo marxaladda xaaladda degdega ah iyo qiimaha la filayo ee soo iibsiga.

13. Xaaladaha la isticmaalayo qaababka wax iibsiga ee aan ku saleysneyn tartanka furan, sida adeegsiga tartamada xaddidan ama kooban ama marka qandaraaska si toos ah lagu bixinayo ama marka ka-leexashada hababka caadiga ah ee qandaraaska la oggolaaday, waa in hay'adda iibinta ay masuulyadda ugu badan iska saartaa ballaarinta tartanka iyo daah-furnaanta, sidoo kalena u dhaqantaa si waafaqsan hagidda ay soo saartay Wasaaradda. Tani waxay u baahan tahay weydiisashada in loo tartamo, lasoo gudbiyo soo jeedinnada iyo codsiyada qiimaha adeegga sida ay u saamaxdo duruufaha, looguna tilmaamo xaaladda sida ku xusan lifaaqa A.

QEYBTA D: Hagidda guud ee soo-iibsiga xaaladaha degdega ah

14. Marka ay timaado baahida loo qabo in la sameeyo wax iibsi degdeg ah, Hay'adda iibinta waa inay marka hore hubisaa in qandaraasyada jira ee bixinta badeecadaha iyo adeegyada lamidka ah, kuwaas oo markii hore lagu bixiyay habraac sax ah, loo isticmaali karo si loogu baaqsado baahi iib cusub. Si gaar ah, Hay'adda iibinta waa inay go'aamiso:

- (b) Haddii uu jiro qaab-dhismeed heshiis oo ansax ah, kaas oo wakhtiga ku habboon ku keenaya badeecadaha, hawlahaa ama adeegga la heli karo; ama
- (t) Haddii ay suurtagal tahay in la cusboonaysiyo ama in muddada loo kordhiyo qandaraasyada jira, Hay'adda iibinta waa inay raacdaa shuruudaha Sharciga libka ee jira ee arrimaha la xiriira ansixinta wax ka beddelka qandaraaska.

15. Haddii ay lagama maarmaan tahay iib cusub, Hay'adda iibinta waa inay sahamisaa fursadaha jira ee habeynta wada-shaqeyneed si loo haqabtiro baahiyaha soo iibsiga degdegga ah (tusaale, soo iibsiga wadajirka ah) si loo dhimo tirada qandaraasyada cusub ee u baahan kara in la bixiyo iyadoo la waafajinayo habraacyada iibsiga degdegga ah. Gaar ahaan Wajiga 2-aad (gurmadka/soo kabashada). Sidoo kale waa inay sahmisaa fursadaha suurtagalka ah ee iskaashiga hay'adaha kale ee dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn (NGO-yada), lana hirgeliyaa haddii ay ku habboon tahay.

16. Soo iibsiga degdega ah, waa in mudnaanta la siiyaa fursadaha qandaraas ee ganacsiyada maxalliga ah (tusaale ahaan, ganacsiyada fadhigoodu yahay ama sida xoogga leh ugu ganacsada deegaannada iyo aaggga ay saameysay xaaladda degdegga ah).

Lifaaqa A. Qeexida habraacyada iyo shuruudaha ansixinta kahor soo iibsiga degdegga ah

Qiimaha la qiyaasay	Marxalada/Xaaladda	Meelaha Ka Leexashada Nidaamyada Rootiinka ah			Habraacyada ansixinta
		Tartanka ⁵	Waqtiga	Dukumintiyada	
Kayar \$100,000	1 Isla-marka ay dhacdo	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah, markasta oo ay suurtagal tahay ama qandaraaska si toos ah loo bixinayo	- Waxa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay ee lagu soo gudbinayo Dalabka Qandaraaska /Codsiga qiimaha - waxaa layska dhaafi karaa waqtiga hakinta	Isticmaalka dukumintiyada & qandaraasyada diyaarsan	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha
	2 Soo-kabashada	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah, markasta oo ay suurtagal tahay ama qandaraaska si toos ah loo bixinayo	- Waxa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay ee lagu soo gudbiyo Dalabka Qandaraaska /Codsiga qiimaha - waxaa layska dhaafi karaa waqtiga hakinta	Isticmaalka dukumintiyada & qandaraasyada diyaarsan haddii loo baahdo	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha
	3 Dib-u-dhiska	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah	- waxaa la codsan karaa xilliyada caadiga ah	Dukumentiyada tartanka caadiga ah	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha

⁵ Isticmaalka dalabka xaddidan ama qandaraaska toos ah looma tix-gelinayo ka leexasho habraacyada caadiga ah, balse waxay u baahan yihii oggolaansho si waafaqsan Wareegtada.

U dhaxeeya \$100,000 illaa \$1,000,000	1 isla-marka ay dhacdo	Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah, markasta oo ay suurtagal tahay ama qandaraaska si toos ah loo bixinayo	-Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – soo iibsiga degdegga ah ee loogu talagalay in lagu taageero ka-jawaabista xaaladda degdegga ah isla marka ay dhacdo -Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta	Isticmaalka la oggol yahay ee dokumentiyada iyo qandaraasyada diyaarsan	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada
	2 Soo kabashada	Dalabka xaddidan markasta oo ay suurtagal tahay, ama Codsiga qiimaha adeegga oo ugu yaraan saddex codsi ah	-Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo iibsiga degdegga ah ee hawlaho gurmadka -Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta	Isticmaalka la oggol yahay ee dokumentiyada iyo qandaraasyada diyaarsan haddii loo baahdo	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada
	3 Dib-u-dhisika	Tartan Qandaraas oo Furax, markasta oo ay suurtagal tahay, haddii kale Dalabka Xaddidan ee qandaraaslayaal cayiman oo ugu yaraan saddex ah	-Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo iibsiga degdegga ah ee dib u dhiska	Dumentiyada tartanka caadiga ah	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada

Ka badan \$1,000,000	1 isla-marka ay dhacdo	Tartan Qandaraas oo Furun, oo leh suurtagalmimada dardargelinta badeecadaha aadka loogu baahan yahay, haddii kale Dalabka Xaddidan oo ugu yaraan saddex codsi ah	<ul style="list-style-type: none"> -Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo iibsiga degdegga ah xilliga ay dhacdo musiibada -Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta 	Use of streamlined documents & contracts necessary	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada
	2 Soo-kabashada	Sameyn ta tartan qandaraas, si loo dardargeliyo badeecada aadka loogu baahan yahay	<ul style="list-style-type: none"> -Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada lasoo gaabiyay – ee loogu talagalay soo iibsiga degdegga ah ee hawlaha gurmadka -Waxaa la tixgelin karaa in laga tanaasulo muddada hakinta 	Isticmaalka la oggol yahay ee dokumentiyada iyo qandaraasyada diyaarsan haddii loo baahdo	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada
	3 Dibudhaca	Tartan qandaraas oo furan	<ul style="list-style-type: none"> -Waxaa lasoo codsan karaa waqtiyada caadiga ah, si loo dardargeliyo soo iibsiga degdegga ah ee loogu baahan yahay dib u dhiska 	Dukumentiyada tartanka caadiga ah	Ka leexashada hababka caadiga ah ee u baahan ansixinta Sarkaalka oggolaanshaha iyo Guddiga qandaraasyada

Lifaaqa B. Foomka Codsiga Oggolaanshaha libka Degdegga ah

Tilmaamo:

- 1. Soo gudbi foomkan si aad u cadsato oggolaanshaha iib kasta oo degdeg ah.**

F.G: Haddii ay jirto khatar ku soo fool leh caafimaadka guud, baraaraaha guud, ama badqabka dadweynaha taas oo halis gelinaysa shaqada dawladda, dhowrista hantida, iyo/ama caafimaadka ama badqabka dadka, soo buuxi foomkan isla markiiba KADIB marka ay jirto arrintan soo foolka leh.

- 2. U dir foomkan oo saxiixan dhammaan xiriirada hoos ku qoran:**

Haddii qiimaha la qiyaasay uu ka hooseeyo \$100,000: [geli magaca Sarkaalka Oggolaanshaha ee ay khusayso]

Haddii qiimaha la qiyaasay uu ka sarreeyo \$100,000: [geli magacyada saraakiisha Guddiga Qandaraasyada iyo emailka iyo madaxa Waaxda libka ee Wasaaradda Maaliyadda]

Magaca Hay'adda libinta:	Qiimaha la qiyaasay ee soo iibsiga degdega ah:
Magaca Xiriirkha Hay'adda libinta: Sharaxaad ka bixi xaaladda degdega ah, sida ay buuxineyso shuruudaha hoose, ku dar duruufaha ka dhigaya mid degdegg ah:	Taleefanka:
Sababta baahida ma ahan mid la sii qiyaasi karo:	
Tilmaanta Xaaladda Degdegga ah: (sax saar dhammaan kuwa khuseeya) <ul style="list-style-type: none">• Waxay khatar ku tahay caafimaadka guud• Waxay khatar ku tahay baraaraaha dadweynaha	<ul style="list-style-type: none">• Waxay khatar gelineysaa shaqada dowladda• Waxay khatar gelineysaa dhowrista hantida• Waxay khatar gelineysaa caafimaadka ama badqabka dadka

- | | |
|---|--|
| • Waxay khatar ku tahay badqabka dadweynaha | |
|---|--|

Alaabta loo baahan yahay, jadwalka waqtiga iyo meelaha la geynayo:

Shuruudaha la codsaday ee kamid ah Habraaca Soo iibsiga Caadiga ah (sida la oggol yahay oo waafaqsan Wareegtada libka Degdeggaa ah):

Tartanka xaddidan: (hal mid sax saar)

- Qandaraasyada xaddidan
 - Codsiga Qiimaha Adeegga
 - Hal Jiho oo keliya: (haddii aad saxdo, bixi sababta kaa dhigeysa):
-

Wakhtiyada la dardargeliyay: (sax saar dhamaan kuwa khuseeya)

- Soo gudbinta dalabka qandaraaska/codsiga qiimaha – sheeg wakhtiga soo gudbinta dalabka:

- Ka-dhaafitaanka shuruudda hakinta - haddii ay jirto, sheeg muddada hakinta:

Isticmaalka dokumentiyada tartanka ee aan caadiga ahayn: (sax saar haddii ay jirto) •

Si waafaqsan Qodobbada 68, 74, 86, 89 iyo/ama 105 ee Xeerka libka Qaranka iyo Wareegtada MoF ee Soo iibsiga Degdeggaa ah kuna taariikhaysan [taariikhda gelisa], waxaan codsanayaan oggolaanshaha isticmaalka habraacyada iibka degdeggaa ah sida kor ku xusan:

Saxiixa Codsadaha: _____

Magaca iyo Macluumaadka Xiriirka ee Masuulka hay'adda codsiga sameeneysa ee buuxinaysa foomkan:

Magaca: _____

Email: _____

Tel: _____

Lifaaqa C. Qaabka Oggolaanshaha Soo iibsiga Degdegga ah

Si waafaqsan faqradda 5-aad ee Wareegtada libka Degdegga ah, anigoo ah, [... *geli magaca iyo jagada*], waxaan oggolaanayaa iibka [ciwaanka hay'adda iibinta] ee alaabaha/hawlaха iyo/ama adeegyada lagu liis gareeyay Jadwalka 1, ee hoose, illaa qimaha lagu tilmaamay Jadwalka.

Oggolaanshahan wuxuu ku salaysan yahay kuwan soo socda:

- Ku dhawaaqida Xaaladda Degdegga ah: [tilmaan OPM ama Oggolaanshaha ku dhawaaqida Sarkaalka Oggolaanshaha, iyadoo la raacayo Wareegtada Soo iibsiga Degdega ah, Faqrada 3]; iyo,
- Awoodda oggolaatay isticmaalka hababka degdegga ah: [ama sarkaalka oggolaanshaha ama guddiga qandaraasyada iyadoo la raacayo wareegtada soo iibsiga degdegga ah, Faqrada 5]

Oggolaanshahan wuxuu ku salaysan yahay waxyaabaha soo socda:

- Ku dhawaaqidda xaaladda degdegga ah: [*sheeg ku dhawaaqista Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha ama Sarkaalka Oggolaanshaha ee Xaaladda Degdegga ah, si waafaqsan Wareegtada Soo iibsiga degdegga ah, Faqradda 5-aad*]
- *Oggolaanshahan waxay dhaqan-galeysaa* [...] *geli taariikhda*] waxayna dhaceysaa [...] *geli taariikhda*.

[Saxiixa Maamulka Oggolaanaya isticmaalka habraacyada degdega ah ee kor ku xusan]

[Jagada]

Taariikhda

JADWALKA 1

Badeecadaha, hawlahaa, ama Adeegyada la soo iibinayo	Qiimaha la filayo ee badeecadaha, Hawlahaa ama Adeegyada	Ka leexashada la oggolaaday ee habraacyada soo iibsiga caadiga ah iyo shuruudo kasta uu ogolaanshahan ku xiran yahay	Taariikhda Ansixinta Guddiga Qandaraasyada (haddii ay jirto)

Qeybta 2 Liisaska hubinta marxaladaha wax ka qabashada xaaladaha degdega ah

MARXALADDA 1 – ka-jawaabista isla-marka ay dhacdo xaaladda			
	Tallaabooyinka	A/NA	Faallooyinka
1	<p>Dardargeli fahamka iyo micnaha guud ee xaaladda degdega ah – sida:</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Dabeeecadda, heerka iyo goobta dhacdada ama duruufaha jira ○ heerka dhaawaca jireed ee ka dhashay, haddii ay jirto ○ xaaladaha amniga iyo badqabka (tusaale haddii ay jiraan miinooyin) ○ gelida aagga – ma waxaa jira xaddidaado ku aaddan cidda geli karta? Marar la gali karo, mise waa mid joogto ah? iyo khatarta miinooyinka? ○ Garashada badeecadaha, hawlaha iyo adeegyada looga baahan yahay ka-jawaabista xaaladda, qiimaha la qiyaasay, iyo ilaha maal-gelinta ○ qiimeynta u diyaarsanaanta saadka iyo awoodda ee aagga ay dhibaatadu saameysay ○ go'aanka in xaaladdu u baahan tahay in wax loogu qabto habraacyada soo iibsiga degdega ah iyo in kale 		
2	<p>Aqoonso jilayaasha ugu muhiimsan ee ku lug leh wax ka qabashada xaaladda degdega ah (QM, deeq-bixiyeyaasha, NGO-yada, ururada bulshada rayidka ah, hay'adaha kale ee dawladda, kooxaha bulshada), adiga oo ka eegaya</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ kartidooda iyo awooddooda, (tusaale, awoodda ay ku sameyn karaan soo iibsiga loo baahan yahay) ○ hawlgallada dhabta ah ay sameyn/ama fulin karaan ○ taageerada looga baahan yahay ○ awoodda ay u leeyihii kormeerka iyo wada-shaqeynta ○ habboonaanta xeerkooda iibka ○ isu-keen oo samee xiriirada degdega ah ee la heli karo iyo macluumaadka kale ee khuseeya (caqabadaha fulinta, khataraha saadka ee imaan kara, iyo carqaladaha alaab-qeybiyaha) ○ Sameynta Iskuduwiidda iyo habaynta iskaashiga ○ Sameynta kanaalo joogto ah oo isgaarsiineed iyo warbixineed oo u dhixeyya kooxda soo iibsiga iyo kooxda wax ka qabashada xaaladda degdega ah 		

3	<p>Raadi ilaha ama suuqa maxalliga</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Aqoonso alaab-qeybiyayaasha/qandaraaslayaasha/adeeg bixiyayaasha, haddii wakhtigu saamaxayo ○ Hubi in soo iibsiga loo baahan yahay laga heli karo ilo maxalli ah iyo in la isticmaalo ilahaas ilaa iyo inta suurto-galka ah 		
4	Bulshada isticmaalayaasha waxay soo gudbinayaan dalabka soo iibsiga; haddii dalabkaas ku codsadaan isticmaalka soo iibsiga degdega ah, hubi inay jirto asbaab loogu baahan yahay		
5	Hubi in alaabta loo baahan yahay lagu heli karo qandaraas guud oo jira, qandaraas hay'ad iibin ama qandaraas lala galay shirkad kale, inta ay suurtagal tahay inay fursadahaan keeni karaan degdegsiimo iyo dardargelin		
6	Go'aami baahida shaqaale ee mashruuca soo-iibsiga		
7	<p>Haddii farsamada lagu sheegay tallaabada 4 aanay suurtogal ahayn, adiga dooro habka soo iibsiga ee la isticmaalayo</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Marka go'aanka si madax-bannaan loo gaarayo, go'aami haddii ay lagama maarmaan tahay in laga tago hababka iyo habraacyada tartanka soo iibsiga ee caadiga ah iyo in kale ○ Marka si waafaqsan sharciga, isticmaalka so iibsiga tooska la dammaanad qaadi karo xaaladaha degdegga ah, go'aami inta ay suurtagal tahay in la ballaariyo tartanka adiga oo codsanaya in lasoo gudbiyo in ka badan hal dalab iyadoo la raacayo habraacyada lagu sheegay wareegtada iyo Hagitaankan 		
8	Raac amarrada saraakiisha la igmaday iyo oggolaanshaha iyo nidaamyada xakamaynta, ama iyadoo la raacayo Hagiddan, ergada degdegga ah ee horay loo dejiyay, iyo oggolaanshaha iyo habraacyada maamulka iyadoo la tix-galinayo baahida loo qabo wax ka qabasho degdeg ah		
9	Ka faa'iidayso hababka elegtarooniga ah ilaa xadka la heli karo si loo fuliyo habraacyada soo iibsiga, sidoo kalena qabashada shirarka guddiga iyo soo saarista oggolaanshaha		
10	Isticmaal dukumentiyada soo iibsiga iyo qandaraasyada qaab-gaabaa ee jira		
11	Aqoonso hababka habboon ee macquulka ah ee lagula socdo fulinta qandaraasyada		
12	U hoggaansan xeerarka anshaxa iyo xeerarka iska-hor imaadka danaha		
13	Samee diiwaanka hawlaha soo iibsiga oo ilaali dukumentiyada iyo diiwaanka qoran ee soo iibsi kasta		

	MARXALADDA 2 – Marxaladda gurmadka iyo soo kabashada	A/NA	Faallooyinka
	Tallaabooyinka		
1	Bulshada isticmaalayaasha waxay soo gudbinayaan dalabka soo iibsiga; haddii dalabkaas ku codsadaan isticmaalka soo iibsiga degdega ah, hubi inay jirto asbaab loogu baahan yahay		
2	<p>Xaqiji jiritaanka xaalado degdeg ah</p> <p>Samee qorshayn ku habboon iyo tallaabooyinka is-diyaarinta oo ay kamid yihin:</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ aqoonso codsiyada soo iibsiga/baahida marxaladdan oo ay ku jirto qiimahooda la qiyaasay, sidoo kalena sameey kala sarreynta mudnaanta ○ aqoonso jilayaasha kale ee dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn ee ku lugta leh wax ka qabashada xaaladaha degdega ah, waxa ay sameynayaan, iyo inaad la yeelato wadashaqeeyn inta ay suurtagal tahay ○ ka faa'iidayso tifaftirayaasha farsamada caadiga ah ee la heli karo, tartanka soo iibka caadiga ah, dukumeentiyada qandaraasyada iyo qaababka diyaarsan 		
3	Hubi in alaabta loo baahan yahay lagu heli karo qandaraas guud oo jira, qandaraaska hay'adda iibinta, ama qandaraaska lala galay shirkad kale, haddii ay jiraan, waxay keeni karaan in si dardar leh lagu keeno		
4	Hubi in alaabta loo baahan yahay laga heli karo ilo maxalli ah isticmaalna ilaa xadka suurtogalka ah		
5	<p>Haddii farsamada lagu sheegay tallaabada 4 aanay suurtogal ahayn, adiga dooro habka soo iibsiga ee la isticmaalayo</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Marka go'aanka si madax-bannaan loo gaarayo, go'aami haddii ay lagama maarmaan tahay in laga tago hababka iyo habraacyada tartanka soo iibsiga ee caadiga ah iyo in kale ○ Marka si waafaqsan sharciga, isticmaalka so iibsiga tooska la dammaanad qaadi karo xaaladaha degdeggaa ah, go'aami inta ay suurtagal tahay in la ballaariyo tartanka adiga oo codsanaya in lasoo gudbiyo in ka badan hal dalab iyadoo la raacayo habraacyada lagu sheegay wareegtada iyo Hagitaankan 		

6	Ka faa'iidayso hababka elegtarooniga ah ilaa xadka la heli karo si loo fuliyo habraacyada soo iibsiga, sidoo kalena qabashada shirarka guddiga iyo soo saarista ogolaanshaha		
7	Isticmaal dukumentiyada soo iibsiga iyo qandaraasyada ku habboon		
8	U hoggaansanta amarrada saraakiisha la igmaday, oggolaanshaha iyo nidaamyada xakamaynta, ama, iyadoo la raacayo Hagiddan, ergada degdegga ah ee horay loo dejiyay, oggolaanshaha iyo habraacyada maamulka		
9	Sahmi suurto-galnimada qaababka iskaashiga wax iibsiga ilaa xad inta macquulka ah		
10	Aqoonso hababka habboon ee macquulka ah ee lagula socdo fulinta qandaraaska		
11	Markasta cusbooneysii maareynta soo iibsiga oo ay kamid tahay wakhtiyada keenista loo baahan yahay		
12	U hoggaansanta xeerarka anshaxa iyo xeerarka iska-hor imaadka danaha		
13	Ilaali qoraalka dukumentiyada iyo diiwaannada qoran ee soo iibsiga		

MARXALADDA 3 – Dib u dhiska			
	Tallaabooyinka	A/NA	Faallooyinka
1	Bulshada isticmaalayaasha waxay soo gudbinayaan codsiga soo iibsiga: <ul style="list-style-type: none"> ○ ku dhaqangeli maamulka caadiga ah ee la igmaday ○ U laabo isticmaalka hababka soo iibsiga caadiga ah ○ Ka-reebitaanka suurtagalka ah ee kaabayaasha muhiimka ah ee degdegga ah oo loo baahan yahay, markaas oo ujeedadu tahay in la kordhiyo ○ tartan xitaa haddii dardargelinta habraacyada lama horaan tahay ○ haddii codsiga uu dalbanayo isticmaalka soo iibsiga degdega ah, kuna dar asbaabta soo iibsiga degdeg ah 		
2	Markasta cusbooneysii maareynta soo iibsiga oo ay kamid tahay wakhtiyada keenista loo baahan yahay		
3	Qaad tillaaboyin la xiriira joojinta habraacyada soo iibsiga degdegga ah <ul style="list-style-type: none"> ○ Hubi in aad leedahay xaqa inaad joojiso soo iibsiga qandaraaska gudihiisa ○ Dib u kaydi badeecadaha degdegga ah, sida loogu baahdo 		

	<ul style="list-style-type: none"> ○ Wareeji alaabaha xad dhaafka ah ama aan la isticmaalin ○ Qiimee hawlaha soo iibsiga degdega ah ○ Qaado casharadii aad baratay iyo agabka haray 		
4	Aqoonso hababka habboon ee macquulka ah ee lagula socdo fulinta qandaraaska		
5	U hoggaansan xeerarka anshaxa iyo xeerarka iska-hor imaadka danaha		
6	Ilaali qoraalka dokumentiyada iyo diiwaannada qoran ee soo iibsiga		

Qeypta 3 Liiska saadka & adeegyada muhiimka ah ee ka-jawaabista xaaladda degdega ah

Sheyga	Lambarka alaabta
Batariyo	
Bustayaal	
Bacaha meydka	
Baaldiyo	
Agabka safarrada gaaban (sariiraha, miisaska, laambadaha, shooladaha, etc)	
Mashiinka geedo-jarista	
Alaabaha nadaafadda	
naftada (badda)	
naftada (shidaalka matoorka)	
Saaridda xoolaha dhintay	
Maacuunta halka mar la isticmaalo	
Biyaha la cabbo	
gawaarida iska-rogaha ah (kireyn)	
Gawaarida culus ee dhulka gura (kireynta cagafcagafta, baldooska, gacmeyda, iwm)	
Gawaarida culus ee dhulka gura (kireynta cagafcagafta, baldooska, gacmeyda, Adeegga farsam-yaqaanka iwm)	
Hoyga degdegg ah	
Raashiinka degdegga ah	
Agab-qubeyksa degdegga ah	
Doobiyo-bareeska	
Siligyada	
Gargaarka degdegga ah	
Tooshashka batariga	
Nalalka waaweyn	
Batrootka	
Dab-dhaliye	
Galoofisyada (kuwa cinjirka ah, kuwa bacda ah, kuwa maqaarka ah)	
Buruska	
Gacamo-badiifiye	
Qalabka gacanta (buruska iyo kashawiitooyinka)	
Masaamiirta	
Daryeelka caafimaadka – agabka dhayida (faashadaha iwm)	
Daryeelka caafimaadka – daawooyinka	
Kireynta Helicopterka	
Daasadaha caanaha carruurta	
Agabka nadaafadda (iskoobaha iwm)	
Jaranjaroooyinka	
Taraqa	
Agab-xafiiseedyada	
Tuwaalada waraaqaha ah.	
Qalabka ilaalinta shahsiga ah	
Barkimaha	

Mutuneellada (darbiga)	
Jikada la rakibo	
Agab-qubeeska la rakibo	
Musqulaha la rakibo	
Qalabka korontada	
Propane and butane	
Kuleeliyeyaasha	
Raadiyaha AM/FM (batariga ku shaqeeyaa)	
Dharka roobka	
Jaayga	
Xargaha	
Kabaha caagga ah	
Jawaannada ciidda iyo ciid	
Majarafadaha (badiilka)	
Teendhooyinka	
Darbaalka	
fooneeyayaasha (la qaadi karo oo ay ku jiraan ‘vehicle relay’)	
Rasiifarada fooneeyayaasha, gudbiyeyaasha, iskujirka	
Gawaarida	
Adeegyada lagu daaweyyo biyaha	
Sifeynta biyaha (caafinta biyaha iyo agabka sifeynta)	
Sifeynta biyaha (agabka iyo isticmaalka)	
Tubooyinka biyaha	
Haamaha biyaha	

Qeypta 4 Qaabka Warbixinta ee Habka Soo iibsiga Degdega ah

Hay'adda libinta: [... *geli magaca, cinwaanka, macluumaadka xiriirka*]

Tirsiga tallaabada soo iibsiga: [...]]

1	Tilmaamidda mawduuca soo iibsiga	
2	Sababaha muhiimka ah ee isticmaalka habka soo iibsiga degdega ah oo ay kamid yihiin: <ul style="list-style-type: none"> ○ Sababaha isticmaalka hababka aan tartanka ahayn ama tartanka xaddidan ama ka-leexasho kasta ee habka soo iibsiga caadiga ah ○ Faahfaahinta dabacsanaan kasta oo la dabaqay si loogu leexdo hababka wax iibsiga ee caadiga ah 	
3	Magaca masuulka oggolaanaya soo iibsiga degdegga ah, taariikhda oggolaanshaha, taariikhda(aha) ansixin kasta ee ay soo saaraan Guddida Qandaraasyadu iyo waxa tallaabooyinka/habraacyada loo maray oggolaanshahan	
4	Aqoonsiga, cinwaanka iyo macluumaadka xiriirka ee alaab-qeybiyaha/qandaraaslah /la-taliyaha (-yaasha) qandaraaska lala galay	
5	Habka wax iibsiga (habraaca) iyo sharaxaada ka leexasho kasta oo habraacyada caadiga ah	
6	Macluumaadka qandaraaslayaasha ka qayb galaya (magacyada iyo cinwaanada) iyo heerka ka qaybgalka maxalliga ah	
7	Qandaraaslayaasha laga soo qaataay tartanka qandaraaska, awwoodahoooda iyo shuruudaha u qalmida ee lagu qaataay	
	Soo koobidda qiimaynta dalabyada/soo jeedinnada	
8	Taariikhda billowga qandaraaska iyo taariikhda la dhammeystirayo qandaraaska	
9	Qiimaha qandaraaska, lacagta [lacagaha] bixinta iyo habka lacag bixinta	
10	Iyada oo lagu saleynayo go'aaminta qiimaha macquulka ah iyo heerka farqiga dhan qiimaha ah oo la barbar dhigo qiimayaasha lagu helo marka la adeegsanayo hababka wax iibsiga caadiga ah	
11	Goobta (aha) la gaarsiinayo	
12	Baaxadda iyo wakhtiga ku habboon fulinta waajibaadka qandaraaska	
13	Haddii heshiiska la soo gabagabeeay iyo sababaha	
14	Wakhtiga lacag bixinta (sheeg wixii dib u dhac ah ee	

	lacag bixinta la xiriira iyo sababaha)	
15	sheeg macluumaadka iyo tignoolajiyada wada-xriirka ee la adeegsaday marxaladaha kala duwan ee habka wax iibsiga (tusaale ahaan, faafinta ogeysiisyada ee internetka, isticmaalka nidaamka soo iibsiga elektarooniga ah (e-procurement) oo ay aqoonsatay ama ay sharchiyeysay Hay'adda, adeegsiga tignoolajiyada la socodka fulinta qandaraasyada)	

Dukumintiyada ku lifaaqan: {halkaan ku tix dukumintiyada lagu lifaaqaayo warbixinta, kuwaa oo ka kooban: casuummaadda u soo tartimida ama soo dirista soojeedinta, dokumintiyada codsiga, tartanka, warbixinta qiimeynta tartanka, haddii ay jiraan wax cabasho ah ee lasoo diray, gundhiga ka noqoshada ama joojinta tartanka iibka/soo jeedinta, ogeeysiiska ku guuleysiga qandaraaska, qandaraaska, dukumintiyada kale ee la xiriira dhaqan-gelinta qandaraaska maamulkiiisa iyo warbixinta maaliyadda}.